# WAXAAD TAHAY ADDUUNKAYGA!!

((QURUX IDILKEED ADIGAA IIGA DHIGAN))

Axmad Aala Xamdaan

Turjume:

**Yuusuf Nuur Xaashi (Ifiye)**

© Xuquuqda buuggan waxay u dhowrsantahay Jaabir publishers.
waxkasta oo xadgudub ku ah xuquuqda buuggan laguma sameyn karo sida: daabacaad, duubis, scan iwm, ayada oo aan fasax qoran laga helin turjumaaga ama madbacadda faafisay.

Mahadsanidiin.

Daabacaadii 1aad, muqdisho 2025.

Waxaa lagu daabacay:
Madbacadda Jaabir printing, isgoyska bar ubax,
Mogadishu- Somalia.
Tell: +252619867747    ISBN 978-91-85945-36-8

Dhammaan sawir gacmeedyada qolkayga yaalla, kuwaas oo had iyo jeerba waardiye iga haya, marka aan qolkayga ka tagayo ee aan albaabka sii xirayo waxaan maqlaa sawiradaas qolkayga yaal oo sheeekaysanaya waliba cod hoose oo aan si sahlan loo maqli Karin, malahayga waxay iga ilaalinayaan in aan sirtooda faafiyo.

Waxay ka sheekaysanayaan aqristayaasha dhinacayga ah marwalba Kuwaas oo markasta oo aan qoraalka faraha ka qaado igu dhaha:

“Ha joojin qoraalka! Xitaa markaad dhimato kedib waxa aynu kula soo maraynaa qalimaan iyo waraaqo, si aad usii joogtayso wax qorista adiga oo qabrigaaga ku jira.”

Xitaa jinniyad ayaa iheshay markii aan yaraa waxayna tiri: “ha cabsan oo iwado oo lajirkaaga iga dhigo waxaan ku barayaa waxyaabo fara badan!”

Marka aan booqdo qabrigii Ayaydeey waxaan yaqiinsan jiray inay isugaysay waxayna idhihi jirtay:

Waan garanayay in aad imaanayso.
Sidoo kale aniguba waan garanayay in aan imaanayo…

Dhammaanteen waxaan moodnaa in halkaa qisadu ku egtahay, iyo in aanu jirin qaybta labaad ee:

RIWAAYADDII MAGAALADA JACEYLKA MA DEGAAN KUWA CAQLIGA LEH.

balse; mar aan ku sugnaa bandhigga caalamiga ah ee buugaagta
Waxaa ii timid gabadh yar oo gacanta ku sidda dhambaallo…

**RIWAAYADDAN WAXAA ALLIFAY:**

AXMED AALA XAMDAAN IYO GABADHA MAGACEEDU UU KU DHAMAADO XARAFKA “T” XIRAN (ة).

**Inta aysan ka qaadan, dhulka ayay warqad ugu tuurtay markii uu warqadii soo qaaday wuu aqriyay:**

**Kaligiis:**

**Waxaan kugu dhaariyey ALLAHA quruxdaan oo dhan kugu mannaystaye, ka hortag oo hasoo dhoweyn qofkasta oo doonaya inuu ku yeesho,**
**Maalin ayaan kuu soo noqon doonaa anigaoo wata ciidanka jaceylka iyo hilawga, si aan u ciqaabo cid walba oo maalin ku fekertay in ay ku yeelato.**

**Markii ay usoo laabatay kun sano kedib; iyada oo dhoolacaddeynaysa ayay dhegta ugu sheegtay waliba cod hoose: Yaa ku baray qoraalka?**
**Isaga oo laabteeda udgoon ku jira ayuu yiri: maqnaantaada ayaa sabab u ahayd.**

# CUTUBKA: 1

## Qoraaga.

# KADIGTOONOOW CAQLIGA MARKA AAD GABADHA LA JOOGTO GABADHU MA JECLA RAGGA GARAADKA BADAN.

# 1

“Inaan weli kusii jeclaan doono uma maleyneyn, inaan kuu hiloobi doono ma fileyn, si kastaba ha ahaato’e kuma rabo, kuuma damqanayo,

Oo kaa fikiri maayo, xaalkaygu waa ka mayro wixii ku soo maray.!

Laakiin; berri si kadis ah ayaan kugu xasuusandoonaa!

Deetana; aad baan uqoslayaa halkii aan kuu ooyi lahaa.

Ma ogthay? Inaan aad kuu necbahay waayo waxaad tahay qofka kaliya ee ibaray inaan ka been sheego waxwalba oo aan dhankaaga usoo qoro.”!

Weerahaani waxa ay ku qornaayeen bogga hore ee dhambaal ay iidhiibtay gabadh yar, oo aan filayo in da’deedu aysan dhaafsanayn 6 jir, kadib markii ay ka soo dhex xaluulatay dadka faraha badan ee igu hareeraysan ee doonaya inaan u saxiixo buugga: MAGAALADA JACEYLKA MA DEGAAN KUWA CAQLIGA LEH, ee bandhiga buugaagta caalamiga ah, 1439-kii hijriga.

Deetana; inta gabadhii yareyd ee dhambaalka ii dhiibtay u hogtay aniga oo dhoolacaddeynaya ayaan iri:

-Waa maxay dhambaalkani maandheey?

-Waa dhambaal.

-Waan garanayaa- hadalkaas ayaan ku iri aniga oo si toos ah u eegaya'

-Waxaan ku waydiiyay yaa kuu dhiibay dhambaaladan?

Gabadhii yareyd farta ayay meel ku fiiqday  deetana; halkii ay farta ku fiiqaysay baan milicsaday, waan ujeedi waayay ciddii gabadha dhambaalka usoo dhiibtay,  gabadhii yareyd ayaan eegay anigoo yaaban, saa wajigeedaba waxaa laga dheehan karaa cabsi meel dheer ah.

"wey tagtay" ayay idhahday iyada oo igu eegaysa laba indhood oo daacadnimo ku dheehantahay, una eg indho bakeyle ka cabsi qaba in la ugaarsado kadibna godkiisii dawaali iskugu shubay.!

Gabadha yari aad ayay u caddahay waxaadba moodaa inay ka timid waddan aanay qoraxdu ka soo bixin, waa indho deeraleey, waxay leedahay waji  siman una eg mid ka mid ah wajiyada taallooyinkii giriigga ee lagu illaaliyay matxafka raadadka qadiimka ah, waxay leedahay oo kale timo aad umadoow oo tidac loogu jiiday waliba si habsami leh, qofka arka gabadhaas wuxuu moodaa in farshaxameyste sawir sameynta ku xeel dheeri uu sawiray isagoo adeegsanaya qad iyo qayaxato, iyo qalimaan kala duwan, waxaase abuuray inta wax abuurta kan ugu wanaagsan.

-Yay ahayd gabadhii inta dhambaalkaan kuu dhiibtay iska tagtay?

Iyada oo maankeedu is diidan yahay ayay tiri:

- Waxay ahayd Gabadhii.

****

Waxaa jira dareen shaki igu beeraya, kaas oo ii yeerinaya in aan garanayo qofka soo qoray weeraha dhambaalka ku qoran.!

Hab qoraalka ceynkan ah xusuustayda ayuu ku wareegayaa, waxaabad moodaa in qofka dhambaalada gabadha yar usoo dhiibay aan meel ku arkay.

-Magacaa maandheey?

Labadeeda gacmood ayay dhabarka gadaale ku qarisay oo walibana dhulka eegtay jawaabna ima siin.

Ma garanyo waxa ay dareentay gabadhaas yari xaaladdaas, gabadha yari waxwalba oo dhambaalka la xiriira wey ogtahay,

Nasiib darro'se dooni mayso in ay wax cadddayso, sidaa awgeed waxaan isku dayay in aan ka ag dhowaado si ay daaha uga qaaddo ogaalka laabteeda buuxiyay.!

****

Asalkaba ma garanayo habka caruurta loola dhaqmo, kolka aan isleeyahay gabadhaan udhawoow wax qorshe ah oo aan ka baaraan dagay gacantayda kuma jiro.!

Waxaan ku fekeray in aan magacayga usheego marka hore, deetana; hadalka aynu baaxaa dajino si tartiib tartiib ah ilaa aan ka qaato xogta aan ka doonayo.

-Magacaygu waa Axmad.

-Waan garanayaa ayey tiri, say haddana tiri: waliba waxyaabo kale oo badan baan dhankaaga ka ogsoonahay.

-Ma hubtaa? !

Madaxa ayay ruxday si dhagari ku dheehan tahay iyada oo dhoolacaddeynaysa waxaadba mooddaa shaydaamad yar.

-Maxaad iga garanaysaa?

Afka ayay kala qaaday iyadoo hadal damacsan haddana si kadis ah ayay afkii uyuubtay, waxaad moodaa inay ballan xasuusatay.!

Arrintaan waxay daaha ka qaadaysaa inay wax iga qarinayso.

****

Waxaan iskugu muujiyay qof deggan oo xasilloon si aysan wax keyg ah u dareemin, aniga oo isku deyaya in aan u dhowaado xageeda.

-Maxaadan iigu sheegin magacaaga?

Mar labaad ayay  labada gacmood dhabarka marsatay iyada oo gacmaha isku duubaysa, dhulkana eegtay, wax jawaab ahna ima siin.!

Wali isma dhiibin waxaan  isku dayay inaan ku tijaabiyo su’aalo kuwii hore ka fudud, su’aalahaas oo (haa ama maya) uun looga jawaabi karo, amaba xitaa ay uga jawaabi karto hab ishaaro ah sida inay madaxeeda waxwalba ku ishaarto iyada oo aan wax hadal ah furin.

-Iskuul ma dhigataa?

-Fasalkee ayaad tahay?

-Waxaad xidhan tahay dhar aad u qurux badan ee ma hooyadaa ayaa kuu doortay?

Waxaas oo su'aalo ah jawaab igama siin, waxaan damcay inaan aad ugu xanaaqo, cabsi galiyo kuna qayliyo sida sirdoonka oo kale marka qof ay wax ku tuhmayaan uu aftaag mooyee wax kale ka waayayaan, balse hab dhaqankaas qalafsan gabadhaas yar uma adeegsan karo, kaliya maaha in aan ahay nin naxariis badan ee dadka hareeraheenna tuban ayaa inoo jeeda.

****

Sida caaddadu ahayd xarumaha daabacaadda ee bandhigga ku sugan, Waxay qoraayada usoo diyaariyeen macmacaanka noocyadiisa kala duwan iyo qaxwo, si ay ugu kifaaxaan inta ay bahda aqriska buugaagta u saxiixayaan, sidaa darteed hareerahayga ayaan si degdeg ah u fiiriyay,

Aniga oo raadinaya wax uun aan gabadha yar ku laaluusho, sida xalwad ama shukulaato, waxaa laga yaabaa inay ila sheekaysato haddaan afka u maceeyo.

-Hoo shukulaatadan.

Markii ay shukulaatadii gacanteeda  gashay markiiba waxay shalam ku siiyay jeebka jaakatiinkeeda,

waxaabad moodaa inay ka baqayso canug kale oo dafaay ah oo raba in uu shukulaatada ka dafo deetana uu kala baxsado oo ay gaari weyso.!

-Hadda iisheeg yaa waraaqahan kuusoo dhiibay?

Farta ayay afka gashatay, inta aysan waxba ii sheegin cabaar ayay fekertay, waxaad moodaa in fekerkeeduba daaran yahay inay ka cabsanayso shukulaatada inaan ka qaadanayo haddii aysan ii jawaabin.

Waxay tiri:

-Waxay ahayd gabadh.

-Waan ogahay inay gabadh tahay ee waa tuma?

Fartii oo wada candhuuf ah inta afka kasoo saartay ayay horteeda ku fiiqday farteedi.

-Halkaas ayay joogtay, balse wey baxday.

****

Waxaan xasuustay in mararka qaar ay caruurtu iga baqaan, arrintaan waxaa laga yaabaa inay u laabanayso garkayga oo aad u weyn maqaskana aysan in muddo ah is arag, amaba waxaa laga yaabaa in gabadha yari ka cabsatay shaaribkayga tirada badan kaas oo mararka qaar qayb kamid ahi ay kor umaleeganto aniga oo aan ugu talo galin, deetana; marka kor looga jeedo waxaa loo maleynayaa in shaaribkayga tiro cayayaan ahi dul fuushan yihiin.

Sidaa awgeed dhoolacaddeyn gacan ku rimis ah ayaan iska raadiyay si wejigaygu ugu muuqdo mid naxariis leh.

-Hagaag, miyaad taqaanaa jidkii ay ka baxday?

Waxay tiri: maya.

Kadibna jeebaddeeda ayay gacanta gelisay, waxayna kasoo saartay toban riyaal, waxyna tiri: qaado ‘ inta waliba dhankayga usoo taagtay ayey tiri:

-Qaado adigaa iska leh.

Waan fahmi waayay waqtigaas, maxay gabadh yari lacag ii siin? Aadna ugama sii fikirin arinka.

Waxaanan iri:

May gabadheydii iska hayso.!

# 2

# SIDEEN QORAA KU NOQDAA.?

Hagaag, shaki fara badan ayaa laabtayda ku dhex hardamaya, shakigaas oo ka dhashay in mararka qaar ay ii imaadaan qayb kamid ah bahda wax aqrisa ee weliba xamaasadda aqrisku biya dhigtay, iyaga oo weliba wata qayb ka mid ah xulka qoraaladooda, kadibna; aniga ama qoraa kale ayay ka dalbanayaan in ay aqriyaan, waxayna kaa dalbanayaan in aad talo iyo ra'yi suugaanaysan ka siisid, waxay ii haystaan qoraa cajiib ah oo iyaga ku bushin kara waxa ay soo qoreen, amaba waxay filayaan in aan siin karo talooyin ka saacidi doona habka qoraalka tolmoon,

balse; xaqiiqada ayaa ah anigu qoraa ma ihi, wax weyna kama fahmo shuruucda qoraalka, ma kala saari karo farqiga udhexeeya riwaayad iyo qiso, mararka qaar waxaan dhibaato ku dareemaa marka aan la fadhiisto qaar ka mid ah qoraayada madbacadda, iyaga oo ka doodaya arrimaha sugaanyahannada iyo suugaanta, markaasaan madaxa iska ruxaa aniga oo iska dhigaya in aan wax fahamsanahay, waxaabad imoodaa arday damiin ah oo madaxa iska ruxa xiisadda xisaabta isaga oo aan waxba fahmin.!

Sida dhabta ah anigu waxaan ahay uun nin sawira waxa ku sugan derbiyada xusuustiisa ilaa inta ay iiga soo laabanayso gabadh iga tagtay oo aan filayo in aysanba soo laabaneyn.!

****

Balse dadku rumeysan maayaan in aanan qoraa ahayn, waxay uhaystaan inaan tawaaducayo oo aan dhulka isdhigayo, waxaan ku qasbanaadaa inaan siiyo wax uun talo ku sheeg ah,  waxaan ogsoonahay talooyinka aan qoraayada siinayo inay dhibto uun mooyee dheef in aanay u lahayn, maalin maalmaha kamid ah ayaa qof aqriste ah  iwaydiiyey:  sidee qoraa ku noqon karaa?

Markaas ayaan ku dhahay “waddada kaliya ee aad qoraa ku noqon karto waa: inaad gabadh jeclaato, kedibna qadarku kaa qaado weliba si qasab ah, markaas oo qura ayaad qoraa noqonaysaa.”

Waxaan wax u qoraynaa si aan khiyaali ugusoo ceshanno wax aysan macquul ahayn inaan nolosha sii wadano la’aantood.

Aniga oo arkaya qofkii hadalka aan u sheegayay in aanu hadalku ku socon ayaan hadalkaygii sii watay:

Dhibta iyo dhaawucu waa waxa qoraaga hoggaamiya, sidaa darteed waa in gabadhu ka digtoonaataa  inay qoraa jeclaato, waayo; maalin ayuu ka haajirayaa isaga oo weliba jecel, kaliya si uu xanuunkaas uu dareemayo marka aad kala tagtaan uu buug cusub ugu soo saaro.!

Haddana waxaan ku dhahay: qoraagu waa in uu aad uga digtoonaado wax yaabaha uu qorayo, waxaa dhici karta in balaayo uu qoray ay si dhab ah ugu dhacdo,  mararka qaar qadarku wuxuu qalinka udhiibayaa kuwa jecel inay qisaska sameeyaan, fursad ayaaba loo siiyaa inay qadarkaa la socdaan, shar iyo kheyr wixii ay qoreen ayaa hadhoow loo dhiibaa.!

Haddaba waxaan ku dhahay:  qofka ay ayeeydiis dhimatay inta aysan usheegin qisooyinkii ay soo martay suuro gal maaha in uu qoraa noqdo, qisooyinka ayeeyooyinka oo qura ayaaba buug idil laga qori karaa.!

Waxaan rabay in aan wax kale usheego laakiin waan iska aamusay, waayo; qofkii talada iwaydiiyay culeys ayuu ku dareemay talooyinka aan tixayo, wuuna iga fogaaday.!

****

Aynu dib u jaleecno arrintii gabadhii yareyd, waxaan la yaabbanahay gabadha wax qortay iyadu dhambaalka iima keenin ee canug yar ayay iigu soo dhiibtay,  waxaan yaqiinsanahay in gabadha yar la soo faray wax jawaaba inaysan bixin,  shakigaas aan qabo waxaa uu toos uga muuqanayaa wajiga gabadha yar.

Waxaan dareemayaa in gabadha waraaqaha soo dhiibtay  ay kor igala socoto,  xitaa waxaan dareemayaa neefsigeeda sidii inay ii dhowdahay, waxaan kaloo suuraysanayaa eegmadeeda ay  kolba dhinac iga eegayso, oo xitaa waxaan dareemayaa  garaaca wadnaheeda.

Qoraalkeeda dhambaalka koobaad ku qornaa ma dheereyn,  laakiin; waxaa uu ahaa dhambaal xeel dheer, ilaa xad aan ka dareemay kalmadahaan in aan loo qorin cid aan aniga ahayn, aniga oo kaliya ayay dhambaaladan igu socdeen.!

Dembi-baare yar oo igu dhex nool ayaa yiri:  waa yaab iyo amakaag, ee baar shakhsiyadda gabadha dhambaaladan kuu soo dhiibtay arrinkaas wax uun dhagar ah ayaa ku maldahane.

Waa sax waxa uu sheegayo baaraha igu dhex nooli.

Haddana; islaan waaayeel ah oo igu dhex nool ayaa tiri : warqadda rog oo ka wareeg aynu aqrino waxa ku qorane.

****

Dhambaalkii Ayaan furay aqris ayaanan ku bilaabay:

Sidaan ayuu ahaa:

“ inta ay naga maqanyihiin waqtigu wuu innagu culusyahay, oo halka saac ayaa sanad kabadan, waan ognahay in aynu  si  badqab ah isku seegnay,  dad kalena ay la xirteen oo xariiro kale galeen, dadkaas kale waxay ku dhahaan hadal ay innaga maalin nagu dheheen, inay abidkood la joogayaan ayay ugu dhaaran doonaan dhawr mar, siday annagaba inoogu dhaarteen oo haddana inoo cidleeyeen.

Si kastaba ha ahaato’e, waxaanu ogsoonnahay xitaa in aysan nasoo xasuusan daqiiqadna, laakiin; arintaan waanu is dhaafineynaa si qalbiyadeennu aysan u ooyin,

Waxaa nala moodaa  gabadh yar oo ka ooyaysa qolka geeskiisa kadib markii looga warramay iyadoo iskuul katimid oo war moog ah welibana faraxsan in AABBAHEED dhintay.

Waxaan ka bartay maqnaantaada in waxwalba la weyn karo  lana hilmaami karo adiga mooye, mudanahaygoow adigu waxaa tahay shayga kaliya ee xasuustayda aan ka bixin,  waxaa tahay qofka kaliya ee aanan jaceylkiisa ka dhex bixi Karin, xitaa haddii uu aad iiga fog yahay.”

Baarihii iyo cajuusadii igu dhexnooleyd ayaa  dhahay: awood sheegad dhanka suugaanta ah weeye.

Waxaa si kadis ah u hadlay qoraagii igu dhex noolaa oo yiri: adiga ayay iska kaa dhigaysaa, sidaada oo kale ayay wax u qoraysaa,  waxaabad moodaa inay qalinkaaga kaa xadday.

****

Gabadhii yareyd ayaan ku dhahay ha dhaqaaqin.  Waxaana ku dhahay halkaaga joog, warqadihii inta duuduubay ayaan agdhigay ayadii, deetana: rucle orod ayaan ku dhuftay  aniga oo raadinaya gabadhaan iisoo qortay qoraalkaan yaabka leh.

# 3

## MAAMULAHA MADBACADDA BUUGAAGTA.

Marka laga yimaado udugga kutubta, waxaa jira udug kale oo dhex qaadaya goobta bandhigga buugaagta.

Allaha halaagana ma dhihi karee cumrigeenna waxaan ku dhammaynay eedeynta qof maqan, ilaa aan  is illowsiinno, kadibna waxaa maalin uun imaan  udugga cadarka kadibna qiso walba halkeedii hore ayay dib uga soo bilaabanaysaa,  sidaa darteed cadarku waa aalad waqtiga inagu dhex safarsiinaysa, cadarku wuxuu inagu celinayaa waqti lasoo dhaafay, waqtigaas cumrigii ka dambeeyay badda ayaa liqday oo maashood ayuu ku dhamaaday,  aynu nafteenna ku qancinno in wax tagay aysan tiigsimaad laheyn.

Markasta oo aan dhanka cadarka aado garaadkaygu wuxuu illeeyahay dib ulaabo doqon yahay, garaadku ma tixgalinayo raadinta  gabadha, qalibigaygu wuxuu ifarayaa in aan gabadha raadiyo.

Qalbigu waxa uu ileeyahay fur halxiraalaha,  waliba wuxuu iigu qaylinayaa sidii nin dibi burursan ( xanaaqsan) uu eryanayo,

Wuxuu qalbigeygu markasta ifarayaa in aan gabadhii baaro kana sal gaaro.

Waxaa gudahayga ka dhacaya hardan adag oo udhaxeeya qalbiga iyo garaadka.

Markii dambe inta istaagay ayaan labadoodiiba ku xanaaqay kuna qayliyay,  anigoo ku leh: waqti la doodo oo lays qabqabsado ma joogno.!

Badanka waxaanu raacnaa arrimaha qalbiga, hadhowna weynu ka shalaaynaa kadib markii aynu dhegaha ka furaysannay dhambaalada garaadka.!

Baadhitaankii gabadha aan ku raadinayay ayaan sii watay.

Sida xaqiiqada ah garaadka badan ma fiicna, qofka garaadka badan fursado badan ayuu qasaariyaa intuu iimo iyo ceebo usameeyo,  dhanka kale ma wanaagsana in uu qofku daba gableeyo qalbigiisa si uusan ugu dhicin waxyaabo badan oo aan macno laheyn!

Sida hagaagsan waa in aynu dib u eegis ku sameyno habka nolosheenna, garaadkeenna iyo qalbigeenna waa in aynu isku dheelitirnaa, waa in aynu mararka qaar waali caqliyaysan waalano, oo waxwalba haddii aynu garaad ku wajahno waxyaabo badan ayaa burburaya,  noloshu sidaas ayay ku sugmeysa kuna xasileysaa.

Kadib; kolkii ay dhamaatay 45 daqiiqo waxaan hubsaday in aanan weli gabadhii gacan ku heyn, dib ayaan usoo noqday aniga oo noogsan lana mid ah sida halgamaa ciidankiisii, asxaabtiisii iyo ehelkiisa la gumaaday oo kaligii ka nool, markii aan soo laabtay gabadhii yarayd waayay, meeshii aan ku amray inay joogtana wey ka tagtay.!!

Waxwalba oo ku saabsan bandhigga buugaagta si quman oo dabiici ah ayuu ku socdaa, qoraayadu waxay ku sheekaysanayaan finjaanka qaxwada ah, dadka bandhigga ka soo qayb galayna waxay kolba eegayaan riwaayadaha kala duduwan ee bandhigga la keenay, kuwa buugta iibiyaahi bahda wax aqrisa been iyo barabagaando ayay ku harqinayaan si ay buugta suuq geyn ugu sameeyaan, ninka iska leh madbacadda ugu tunka weyn madbacadaha bandhigga ka soo qayb galay kursi ayuu ku fadhiyaa, fartiisa ayuu kolba candhuuf marinayaa, oo uu ku tirinayaa lacagta kala jaadka ah ee buugta laga siiyay.!

Waxaan baaray halkii aan dhigay waraaqihii ay gabadhii yareyd isiisay, buugaag Meesha taalay ayaan sare uqaaday, sanduuq Meesha yaalay hoostiisa ayaan ka eegay, qofkii buugtaan iyo sanduuqaanba lahaa Ayaan waydiiyay anigoo is leh waxaa laga yaabaa in qaban qaabiyayaasha bandhigu ay meel dhigeen, waxay iisheegeen in aysan waxba arag, gabadhii yareyd ayaan waydiiyay waxayna ii sheegeen inaysan xitaa gabadh yar arag.

Xaaladda aan ku jiro waxay iila egtahay sidii qof riyo (qaraw) ay ka go’day kadib markii uu ku kacay qaylo meel baas ka timid.!

*****

Nolosha waxaynu ka barannay in qofna uusan haysan waqti uu ku dhagaysto murugooyinkeenna gaarka ah.

Dhanka kale waxaanu baranay in aynu qarsanno xanuunada qalbiyadeenna, xitaa haddii uu qof isku dayo in uu ina dhagaysto.

Haddii uu qof ina waraysan maago inta dhoolacaddeyno ayaan si been ah udhahnaa: khayr iyo barako weeye.

Mararka qaar waxaa jira dhacdooyin aan la qarin Karin waqti dheer,

Dhacdooyinkaasi waxay lamid yihiin nukliyeerka wax gumaada,  waxaa waajib ah in cid kale aynu la wadaagno haddii kale qalbigeenna ayuu ku dhex qarxayaa,   waqtigaas waxaan ubaahnaa saaxib wanaagsan,  oo aan waxwalba usheegto, waliba waxaan ubaahnaay saaxiib aan ogahay markaan waxwalba usheego in uu waxwalba halkaa ku ilaawayo.

Haddaba  saaxiibka wanaagsani waa mid markaad waxwalba usheegto isla Meesha ku illaawaya oo aan hadhow adiga kuu adeegsanayn, saaxiibkaasi waa midka aad xasuusato isla marka aad ku dhacdo dabin, waa qofka horay kaa fahmaya adiga oo aan ku dheeraan sharax iyo fahansiin, waa qofka aad ka maqnaanayso hadana markaad ku soo laabato kuma canaananayo oo wuxuu ogsoon yahay in aad mararka qaar kalinimo ubaahan tahay, waa qofka aad ku canaanan karto dambi uusan galin ee aan haddana wax caro iyo cuqdad toona kuu qaadeyn, waa kaa saaxiibka wanaagsan ee lagama maarmaanka ah.!

Anigu maalinta aan gabadhaas raadinayay wax saaxiib ah malaheyn,

Sidaa darteed waxaan go'aansaday in aan banaanka bandhigga buugta ubaxo, si aan hawo nadiif ah oo bilaa rabsho ah usoo qaato.!

Sidaa markaan ugasoo fogaaday bandhiggii ayaan maqlay cod wadnaha igooyay:

-Xageed ku dhuumatay waxaa ikaa waydiiyay qaar kamid ah aqristayaashaada?

Waa maamulihii madbacadda, dhoolacaddeyn caro ku dheehantahay ayaa ka muuqata, waan garanayaa sababta uu u xanaaqsan yahay, ma ahan inuu bahda aqriska u damqanayo ee waa inuu rabo lacagta jeebkooda ku jirta,

Markasta waxa uu ka fekerayaa sidii uu lacag badan uga heli lahaa dadka wax aqrista waxwalba lacagta ayaa uga muhiimsan.!

Hadalo kulkulul ayaan dhihi lahaa haddii aanan ku xushmeyn da'da uu iga weyn yahay, deetana; waan ka aamusay, hagaag, runtii been baan sheegayaa, sida xaqiiqada ah waxa aan odayga u ixtiraamayo ma ahan in uu iga da' weynyahay, ee waxaan xasuustay in uu igala dhaxeeyay heshiis, maamulaha madbacadda waxaan la galay heshiis gaaraya toban sano oo ku saabsan in uu daabaco dhammaan buugaagtayda oo idil! Inta heshiiskaasi socdo qoraagu xaq uma lahan in cidkale daabacdo ama faafiso buugaagtiisa.

Waxaan la yaabanahay Shaydaankee ayaa igu qanciyay inaan odaygaas heshiis la galo.

Deetana; waxaan ka cudur daartay maqnaanshiyahayga,  kedibna waxaan si deggan ugu dhahay: “hadda ayaan soo xaroonayaa, hawo yar Ayaan qaadanayaa, kadibna; waxaan dhameystirayaa saxiixa buugaagta.!”

Madaxa ayuu ruxay isaga oo iska dhigaya in uu ku qancay hadalkayga kana xun in aan banaanka usoo baxay.!

Xaaladda aniga iyo maamulaha waxaad moodaa sida nin taraafiko ah oo u dhoolacadeynaya darawal mooge ah oo ku xadgudbaya sharciga wadooyinka kedibna askarigu rabo inuusan u qaban khaladkiisa.

Candhuuftayda ayaan dib uliqay inta aanan hortiisa ka dhaqaaqin, maamulihi jeebadiisa ayuu gacanta galiyay isaga oo leh: “ooh eeg, ha bixin, waxaan ku sigtey inaan hilmaamo”.

“wax adiga oo kaliya laguugu talo galay ayaa jira”. Sidaasi waxaa yiri maamulaha oo dhowr tallaabo igasii fogaanaya sida inuu wax uun meel kasoo qabsanayo.

Xiligaasi waxaan niyadda iska dhahayey: yay noqon kartaa gabadhan dhambaalada soo dhiibtay, haa, macquul matahay inay tahay gabadhii magaceeda uu u dambeeyey xarafka “T” xiran (ة),

# 4

# LACAGTII TOBANKA RIYAAL AHAYD.!

Maamuhilii ayaa igusoo laabtay asagoo gacanta ku sida dhambaaladi welwelka igu hayey, waxaa uuna yiri:

Gabadh yar ayaa ii timid intaad maqnayd waxayna iga dalbatay in aan ku siiyo warqadahan, warqadihii waa uu isiiyey, kadibna si uu usoo bixiyo waxkale, ayuu sarwaalka jeeniska ah gacanta udiray, waligay ma arag isaga oo sarwaal kale wata.

Maamulihii: lacnad haku dhacdee lacagtii xaggee ayey aaday waan xasuustaa jeebkaan ayaan galiyay.!

Dhammaan jeebadihiisa ayuu baaray waxse kama uusan helin, waxaa muuqata in waxa uu baarayo ay sarwaalka gudahiisa ku dhaceen, waxaa kaloo muuqata in dhammaan jeebadihiisu ay dildilaacsan yihiin.!

Maamulihii: markasto jeebabkaan waxa aan galiyo wey iga lumaan,

Wey idhibeen jeebadahan dildilaacsan alaab badan ayaa inta galiyay iga luntay.

Waxaan iri: waxa aad raadinayso miyay ikhuseeyaan aniga?

Maamulaha: waxyar sug waad arkiye.

Si degdeg ah ayuu u baalla daymooday, sidii inuu rabo in uu wax sameeyo.

Kadibna; waxaan ku iri: Maxaad sameyn rabtaa?

Maamulihii: sug waan keeniye.

Hadalkiisa ah in uu wax soo wado been ayaan u haystaa, mana rumeysanayo illaa aan arko waxa uu raadinayo, jeebabkiisa dhan ayuu baarayaa sidii in uu heli karo waxa ka maqan.

Maamulihii ayaa ku qayliyay: waan helay.!!

****

Kadibna; gacantiisa ayuu soo taagay si uu waxa uu raadinayay ii siiyo.

Deetana; waxa uu yiri isaga oo gacanta soo taagaya  waa toban riyaal, waxaa iigu kaa dhiibtay gabadha yar inta aysan tagin, waxayna iga codsatay inaan kuu dhiibo.!

Maamulihii ayaan eegay aniga oo yaaban, lacagta uu iisoo taagayo waa qadiim wasaq ayaa ka muuqato sidii lacag ay ilmo gacanta ku dhigeen, sidii in uu cudur halis ah qabo maamuluhu  ayaan gacantiisa iska ilaaliyay, kadibna; waxaan ku dhahay: ma doonayo ee iska hayso.!

****

-Arrintu waxaa ay u eg tahay mid muhiim ah- maamulihii ayaa sidaa yiri.

-Maxaa kawadaa? Ayaan ku iri.

Maamulaha: Waraaqaha ayaan ula jeedaa.

Waxaan ku iri: maxaad sidaas u leedahay?

Maamulaha: gabadha yari dhawr jeer ayay iisoo laabatay si ay iigu adkeyso in aan ku siiyo waraaqaha iyo lacagta tobanka riyaal ahba, markii u dambaysay waxay la socotay gabadh aan umaleynayo inay hooyadeed tahay,

Seddex jeer markii ay igu dhaariyeen  in aan xogtaan ku siinayo ayay iga tageen.!

Inta hadalkii ka dhexgalay ayaan ku iri:

-Ma ii sifeyn kartaa sida ay u ekeyd gabadha aad umaleysay in ay gabadha yar dhashay?

Maamulihii:

Ma xasuusan karo muuqaalkeedii oo dhameystiran iyo tilmaamaheediiba, waayo; si hubanti leh uma eegin.!

Anigu waan garanayaa in maamulaha madbacaddu aad u indho dheer yahay,  ishana kama qaado gabadh walba oo agtiisa maraysa, waxaan iswaydiiyay maadaama uu maamuluhu ahaa shaxaari indhaha gorgorka oo kale leh sababta aanu gabadha u eegin, deetana waxaan ku iri:

-Maxaadan aad ugu fiirin gabadhii wadatay canugta yar?

Jawaabo dhawr ah oo aan ka filayay maamulaha ayaa maankayga hareeyay.

Maamulihii: wey qurux badneyn heer aan kari waayay oo ka qajilay in aan wajigeeda eego.!

Jawaaabta uu i siiyay maamuluhu waxay dhammaanba ka duwan tahay warcelintii maankayga ka hiqlaheyd.

# 5

# ((GABADHII MAGACEEDU KU DHAMMAANAYEY XARAFKA “T” XIRAN (ة) ))

Maamuluhu wuxuu soo eegayaa dhankayga isaga oo raba in uu wax uun ka garto warqadaha iyo dhambaalada ay gabadhu sida daran Uga dardaarantay, laakiin; maamuluhu ma aanu garanayn sida uu hadalka maankiisa ka guuxaya cod ugu baddali  lahaa si uu jawaab ugu helo waydiimihiisa, maamuluhu si deggan ayuu ii waydiiyay:

-waa maxay qisada dhambaaladan?

Asalkaba ogoow marka aynu qof wax sir ah usheegayno waxay la mid tahay innaga oo qofkaas baalooto u hadiyadaynay, waxaa laga yaabaa in uu maalin inagu toogto isla baalootadii (rasaastii) aynu u hadiyadeynay.

Sidaa darteed waa in aynu il muggeed ku eegno dadka aynu u bayaaminayno siraheenna.

-Maamule wax qiso ah ma jiraan ee nabad gal.! aniga oo waliba sii qancinaya maamulaha Ayaan ku iri:

waa uun gabadh rabta in loo eego suugaanteeda deelqaafka ah, sidaa darteed ayay kuu fartay in aad iidhiibto.

Hadalkaas maamulaha kama daadagin, laakiin; waa is daad raaciyay madaxa ayuuna ruxay sidii dawac wax maagan.!

Wax fikrad ah maankayga kuma ogi, kaliya su'aalahayga ayaan doonayaa in la iiga jawaabo:

1. Waayo gabadha yari?
2. Yaase ka dambeeya shaxdaan shaydaannimada ah ee ay ila ciyaaratay?

3. Yay ahayd gabadhii kale ee tan yar wadday?

4. Gabadha qoraalkan samaysay waa ayo?

Su'aasha waxaasba ka muhiimsan waa:

5. Gabadha yar iyo tan wadday iyo qofka is qarinayaba ma hal qofbaa? Sidee waxaasi macquul ku yihiin?

cajuusadii igu dhex nooleyd oo usheeda ku tukubaysa ayaa tiri:  iska dhaaf su'aalaha faraha badan,   aqri warqadaha laguu dhiibay.

Deetana: warqaddii aan horay u aqriyay maahane tii ka hooseysay ayaan aqris ugu dhaqaaqay:

****

Waxaaba ku qoran:

“waanu kala tagnay balse sujuudda Ayaan ALLE kuugu baryaa,

ALLE ayaan dambi dhaaf kuu weydiiyaa markasta, sadaqada aan masaakiinta siinayo ayaan kuu niyaystaa.

Marka aan gacanta shilinka u saarayo,  waxaan kuu waydiiyaa masaakiinta inay adiga kuu duceeyaan baddalkii ay aniga ii duceyn lahaayeen.

Waxaan eegmada ku dheereeyaa indhaha murugsan ee masaakiinta, deetana adiga oo indhahooda dhex taagan ayaan ku arkaa,

Deetana; gacanta ayaad iisoo taagtaa adiga oo cod dheer ku leh: "waanku doonayaa"

Ma taqaanaa?  waa maxay jaceyl? !

Waa in aad juhdi fara badan bixiso  si qof aad jeceshahay aad jannada ugu kulantaan.

Jaceylku  waa in qofka aad jeceshahay aad u duceyso in ka badan inta aad naftaada u duceyso.!

Ma ogtahay? Weli inaan ilaaliyo ubaxii guduudnaa ee aad ii keentay markii aad isoo doonanaysay.

Ubaxaas aad ii keentay habeen kasto madaxayga Ayaan dhigtaa aniga oo  filaya in aan maqli doono adigoo ileh:

"Waan ku jeclahay waxaadna ii tahay waxwalba oo qurux badan,

WAXAA TAHAY ADDUUNKAYGA.!"

Si kastaba ha ahaato'e

ma taqaan sababta  uu u qallalay ubaxii guduudnaa?

Sababtu waa: wadka ayaa noloshii ka qaaday, maya sidaas maaha, ee annaga ayaa kala irdhownay mana aynaan is haleelin isa seegaa kadib."

# 6

# ALLA yaa rabbi waa iyadii!

Maamulihii:

-Waa tuma?

Markii ay aamusnaantaydii dheeraatay wax jawaab ahna aanan siineyn ayuu mar labaad isla su'aashii iwaydiiyay:

-Yay tahay?

Anigoo degdegaya ayaan iri: meel dhow ayaan ka soo laabanayaa.!

Waana ka soo fogaaday maamulihii.

****

"Waa gabadhii aan ubaxa u hadiyeeyay" Ayaan ku cel celinayaa aniga oo laamiga gacanta u haatinaya baabuurta tagaaasida ah, waa gabadhii xarafka "T" xiran (ة) uu magaceeda u dambeeyey, waxaa lagama maar maan ah in ay wax uun ka aqrisay qoraaladayda, gaar ahaan buugga magaalada jaceylka ma degaan kuwa caqliga leh.

Ugu dambeyn gaarigii taksiga ahaa waan helay, dawaali ayaanan kursiga dambe iskugu tuuray, waxaanan faray inuu huteel aan u tilmaamay igeeyo kaas oo aan degganahay,  waxaad imoodaa shimbir buulkeedii dib ugu laabanaysa ka dib markay halis lasoo kulantay.

Intii aynu u soconnay huteelka waxaan ka fekerayay -tolow gabadha ma laqabaa?

-Teeda kale, ma laga yaabaa in ay hooyo u tahay gabadha ay wadato?

Si degdeg ah ayaan ugu qayliyay:

Suurogal maaha suuro gal maaha inay guursato?

Waayo; balanteennu ma ahayn in ay cid kale guursato.!

Darawalkii gaariga ayaa muraayadda haadka igu aadiyay si uu ii arko maadaama aan sare uqayliyay,  markaasuu yiri: mudane maxaa qaldan?

Waxaan ugu warceliyay waxba, neef dheer ayaan sambabada udiray bal inaan nafiso, markaasaan ku iri: wax dhib ahi ma jiraan ee socodkaaga wado.

Xaaladdddaas  darawalka  tagsigu yaab ayuu ku jiray, si  kadis ah ayaan u arkay isla gabadhii yareyd ee dhambaalada ii dhiibtay oo meel fadhida  kor inta u qayliyay ayaan ku idhi:

Ma laftirkaagiibaa?  Iyadoon wax jawaab ah isiin ayay madaxa ruxday,

iina ishaaraysa inay isla iyadii tahay, anigoo af labadii yeeraya ayaan iri: oo ma waxaa hortayda ku sugan isla canugtii waraaqaha iidhiibtay.?

Faruuryaha ayay dhaqdhaqaajisay madaxana waa ruxday, se markaan waxaan kala saari la'ahay inay ishaareyso haa ama maya.

Kursigii ay ku fadhisay ayay la sii jeesatay.

Aniga oo gaariga tagsiga ah qoorta ka dhiibanaya ayaan ku iri: gabadhii waraaqaha kuu soo dhiibtay ma hooyadaabaa?

Iima aysan jawaabin sababtoo ah isla markiiba waa ay qarsoontay, gaarigii ayaan is taajiyay waanan ka dagay, darawalkii oo yaaban ayaa yiri: mudane maxaa ku helay?

Waxaan iri: gabadhii?

Darawalka: gabadhee?

Markaas ayaan ku iri: gabadhii yareyd ee hadda halkaa fadhiday aniga oo gacanta ku fiiqaya halkii ay fadhiday, ma arkin miyaa?

Darawalka: qofna halkaa ma fadhin kaliya jaam yar ayaan galnay.

Waxaan iri aniga oo fajacsan: halkaas ayay fadhiday waxyar kahor anigaaba arkayey.

Darawalka oo  wejigiisa caro ka muuqato  ayaa yiri:  gabadh yar iyo tu weyn toona maynaan arag intaan soconnay mudane.

Kadibna wuxuu ii ishaaray in aan gaariga galo, layrarka gudaha inta wada shiday ayuu yiri: wax aynu aragnay ma jiraan xitaa hareerahaaga si fiican u eeg.!

Aniga oo wareersan ayaan dhammaan hareerahayga eegay, sidii inaan ahay canug madax adag  oo aan hadalba rumeysan wax uu dhaayihiisa ku arko mooyee.

Markaas ayaan yiri: waad iga garleedahay anigoo soojeeda ayaan riyooday ee soco adiga oo mahadsan.

****

Waqti dheer ayaanu taagannahay welina darwalkii gaariga ma dhaqaajin, inta is xanaajiyey ayaan iri: maxaa qaldan meynu soconno?

Darawalka: iga raali noqo, intaan kedib kuma sii wadi karo, waxaan rajeynayaa in aad gaarigayga si degdeg ah uga degto, waxii lacag aan kaa qatayna waa tan ee qabso.

Codkiisu waa kakanaa, hadalkiisana xanaaq ayaa ku dheehnaa, go'aankiisuna waa caddaa.  Isla markaa laftaydu waxa aan qalinka ku duugay in aanan darawalka ku qancin Karin in aan qof fiyoow oo caafimaad qaba ahay, oo garaadkiisu u dhameystiran yahay,   gaarigii ayaan ka dagay aniga oo af labadii ku leh: waxaan hubaa in aan gabadha arkay.!

# Cutubka: 2

# DHAMBAALLADA GABADHII MAGACEEDU KU DHAMAANAYEY "T" XIRAN (ة).

**YAANAY KU SIRIN DHOOLACADDEYNTA WEJIGAYGA, WAXWALBA OO GUDAHAYGA AH BURBUR IYO BASAN BAAS AYAY KU SUGAN YIHIIN.!**

# 1

**Waan kuu xiisay, wax ka daran ma jiraan maqnaanshiyahaaga xitaa  geeridaba kolay ku tahay.**

**Anigu  waxaan ahay riyadaada kaa maqan.**

**Sidee tahay bal iisheeg? Waxaan rajeynayaa inaad  nabad qabto**.

****

ISNIIN.

4:57 pm.

((Maktabadda dhexdeeda)

Waqtigaas aan maktabadda dhex fadhiyo sida caadadayda ah wax aan adiga ahayn kama fikiro, gaar ahaan markaan kala rogayo buugaagta maktabadda, aniga oo raadinaya kitaab aan kaga gaashaanto cidlada iyo  kalinimada.

Ha u maleyn in aan waddanka ka tagay oo daltabyo ihayso,  laakiin nasiib darro waxaa jira waddan  dhan oo aniga iga tagay,  adigu kaliya jaceylkayga  ma tihid, iskabadaa in aad jaceylkayga oo qura ahaatee waxaad ii tahay waddan idil oo ku darsan waddankayga gaarka ah.!

****

Intaynaan kala irdhoobin ma xasuusataa, ma jecleyn in aan wax aqriyo? Laakiin; hadda wax aqriska aad baan ujeclahay, waayo; waxaa uu noqday waxa kaliya ee aan kugu soo xasuusan karo,

Wax aqrisku waxa uu ii noqday Meesha kaliya ee aanu ku kullano, wuxuu ii noqday waqtiga kaliya ee adiga ii kaa soo celin kara,

Meeqo jeer ayaan kugula kulmay sheekooyinka sindibaad,

( sheekooyinka kun habeen iyo habeen) buug kasta oo aan aqrinayo weynu ku wada kulannaa.

****

Waxaan xasuustaa maalin aad buug aqrinaysay, hortaada ayaan taagnaa waxaanad la sheekeysanaysey buug aad la dhacsanayd, waxaabad moodaa in uu buuggu maqlayo waxa aad u werinayso.

Waxaan amakaag udhiman gaaray marki aan arkay adiga oo iska aamusan, buugga eegaya, madaxana u ruxaya sida inuu wax ku farayo,  waxaad moodaa in buuggaasi kuu sheegayo xog aysan cid kale maqli Karin.

Kitaabbadu waa saaxiibadeenna garaadka badan, ee inaga saacidaya caalamkaan waalidu haraysay,  markii aan ku arki jiray adiga oo buugaagta ka warramaya, inta si doqonimo ah kuu eego ayaan dhihi jiray:

“Waxba kama fahmayo waxaad sameynayso gacaliye”  inta  si deggan u dhoolacaddeyso ayaad ookiyaalaha sanka soo saari jirtay.

Buuggu waa garaad fikir leh,  sidaa darteed marka aan buug dhameeyo waxa aan jeclahay in aan la sheekeysto.

***

Wax badan ayaad aqrin jirtay, sidaa darteed hadalkaagu mid suugaamaysan ayuu ahaan jiray, aniguna wax ma aqrin jirin, sidaa darteed weedhahaaga mugga iyo miisaanka leh ma fahmi jirin mana weeleyn jirin, sida jiijiil bolo-boolo hooyadiis ah oo dabaalanaysa meel sare uga jeeday, in uu dabaashana raba balse aan kareyn oo garanayn sida lo dabaasho.!

Waad ogeyd gacaliye in aanan daneyn jirin aqoonta iyo wax aqriskaba,  si kastaba ha ahaatee haddana; muxaadaraad suugaanta ku saabsaan ayaad ii marin jirtay, kuwaas oo ka hadlaya gabayga, falsafadda, iyo riwaayadaha, muxaadaraadkaas aniga uunbaad ii jeedin jirtay oo waqtigaas dad kugu xidhan oo kaa faa'iidaysta ma aysan jirin.

Mar ayaad igu tidhi qof walba maantay wuu awoodaa in uu gabyaa noqdo, gabaygu marka loo eego hadalkaaga kaliya waxa uu noqonayaa hadal bilaa murti ah kaas oo qof caan ahi soo jeedinayo kadibna layskaga sacbinayo si mujaamalo ah.

Waxaan kuu qirayaa gacaliye in aanan hadalkaas waxba ka fahmin markii aad ii marinaysay,  kaliya si fiican ayaan kuu dhagaysanayay waayo; gabadhu wey jeceshahay in ay u dheg raariciso ninka ay jeceshahay xitaa haddii uu hadal bilaa macno ah iska dhurayo.!

****

Mararka qaar in aad doorato buuggi munaasabka ahaa ee aad aqri lahayd ayaa ah arrin dhib badan,

waxay la mid tahay sida gabadh ku wareersan beertii ay kaga nasan lahayd magaalo beeraha lagu nasto ku badan yihiin.!

Mar ayaad iisheegtay in buugaagtu dadka doorato oo aysan dadku buugta dooran sida ay dad badan moodayaan.!

Buugaagtu waa  noolayaal jira oo neefsada, waxay tunka ku sidaan ruuxda qoraayadii qoray, bal tijaabi oo hor fadhiiso maktabaddaada, kedibna buugta u fiirso sidii inaad illaalinayso ubax beer kasoo baxi raba, waxaad arki doontaa buug kaa dalbanaya in aad aqriso.

Waxaad  kale oo aad hadda ka hor igala dardaarantay in aanan aqrin buugta ay bahda aqrisku ku dardaarmaan aqriskooda, markii aan ku waydiiyay sababna waxaad tiri:

Buugtu waa sida dawada, daawada dad kale ku bogsoodeen waxaa dhici karta in aanad adigu ku bogsoon, waayo; isku cudur ma tihiin, kaliya waxaad aqrisaa waxa kaliya ee garaadkaaga waafaqaya.

Markaas ayaan ku iri: dawo aa?

Markaas ayaad iigu jawaabtay:

Haa! Aqrisku waxa uu hagaajiyaa waxa ay noloshu hagardaamayso.

Waa arrin yaab leh marka aad jeclaato qof qoraalka iyo aqriska jecel oo wax walbana ka jecel, waa wax wanaagsan waana wax dhib badan.

Waxaad la dhaqmaysaa qof rumeysan riwaayadaha in ka badan inta uu waaqica rumeysan yahay, waxa uu kuu fasirayaa wax yaabaha ugu adag ee lagu wareersan yahay, sida uu wax u fasirayo waxaabad moodaa in uu qiso hore kaaga sheekaynayo, waa qof markasta warcelin qurux badan u keena hal xiraalayaasha wareerka leh, maaha in uu aqoon yahan yahay kaliya ee waa in uu yahay qof ku kalsoon khiyaaliga in ka badan inta uu aqoonta iyo cilmiga ku kalsoon yahay.

Waxaan xasustaa maalin aad su'aal iwaydiisay ahayd: maxay tahay sababta uusan kalluunku wax cod ah ulaheyn sida xayawaanada kale?

Muddo dheer ayaan fekerayay, laakiin; waan waayay jawaab aan ku qanco, kadibna; waxaan ku dhahay: ma garanayo.

Deetana; waxaan ku waydiiyay maxay baddu hadalka malayga ugu diidaysaa?

aniga oo og in aan ku qanci doono jawaabta aad isiin doonto sidi inaad cagta soo marisay cilmiga badaha ayaad iigu jawaabtay:

"si ay san usheegin sirta badda kadib marka ay ku dhacdo shabaagta kalluumeystaha.!"

# 2

# BUUGGII MADOOBAA.!

ISNIIN.

5:13 pm.

Wali maktabadda ayaan joogaa.!

Sida gabadh qurux badan oo kursi ku fadhisa miisna uu horyaalo una muuqata qof daacadnimo biyo dhigtay, sugaysana wiil gacanta u soo taaga oo xafladda ay kaligeed Meesha kursiga ah ka fadhido kula dhex ciyaara, sidaas oo kale ayaan maktabadda udhex fadhiyaa,

Sidii aad adiguba sameyn jirtay.

Waxaan si deggan u eegayaa kutubtaa raseysan, waxaan si kadis ah u milicsaday buug miis saaran oo aad moodo in uu iga codsanayo in aan aqriyo, baalashiisa qaar kamid ah ayay dabayl yari kala furaysaa, waxaad moodaa in uu i leeyahay: kaalay oo i aqri.

Qayb kamid ah qaanadaha buugta maktabadda ayuu buuggu iga soo fiirinayaa, waxaad moodaa inuu ishaaro igula hadlayo sida gabadh yar oo si fiican loo baray habka ku hadalka ishaarada, waxaan mooday in buuggu meeshiisa ka soo booday sidii rahda ama rakada.

Buuggaas jaldigiisu waxaa uu ahaa madow, halka qoraalka dusha uga xardhanna uu ahaa caddaan iyo guduud,  laakiin; cinwaanka buugga ma aqrin Karin oo masaafada inoo dhaxaysa ayaa dheereyd,  dhankii buugga ayaan u hinqaday si aan ugu dhawaado, waan yar is taagay kadib markii aan kor uga jeeday sawirka wiil  caraysan oo buugga ku sawiran, deetana; waxaan xasuustay hadda ka hor mar aad ii jeedinaysay muxaadaro suugaan ah inaad idhahday:

Ma rumeysanayo qoraayada sawiradooda buugta ku dhajiya. Kadibna waxaan kuwaydiiyay oo sabab?

Waxaad igu tiri: Sida saxda ah xayaysiin kama shaqeeyaan ee qoraal ayaa laga rabaa, ma ahan inay sawiro la wereegaan.

Waxaadna ogaataa badanka qoraayada sawirkooda buugga ku dul dhajiya waxa kaliya ee ay doonayaan waa in ay caan noqdaan.

Deetana waxaan ku waydiiyay, oo maxaa ku jaban in ay caanimo raadiyaan?

Waxaad iigu jawaabtay:

Qoraaga dhabta ah wuxuu ku jiraa god, caanimaduna waxay murtida ka qaaddaa qoraalkiisa.

Adiga oo dhoolacaddeynaya ayaa tiri: ufiirso qoraayada cusub, inta hore qoraalka xoogga ayay saaraan, sababta oo ah lama yaqaano, laakiin;

marka ay dadku bartaan dhankoodana loo jeesto, buugtooda dambe waxay noqotaa qashaabiir iyo wax aan waxba laga faa'iideyn.

Cabaar ayaan aamusay aniga oo hadalkaaga ka fekeraya, kolkaas ayaan iri: ma garanayo laakiin kuguma waafaqsani waxaana dareemayaa in aad ku xeel dheeraatay,

intaa kadib;

Waxaan dareemay in neeftuurkaagu batay, kuleylka neeftaadu waxa uu ka soo dhex baxayey moobilka aynu ku wada hadleyno, markaas waxa ay ahayd waqtigi aad isoo doonanaysay sidaa darteed waxaan is iri:

Buuq aan loo baahnayn ayaad Meesha keentay, waxaanan iska dhigay in aan kugu waafaqsanahay aniga oo ku leh: sida aad sheegtay ayaa sax ah, qoraagu god ayuu ku jiraa caanimaduna waa ku ebtalo.

Balan ayaan kaa qaaday in aanan aqrinayn buug uu qoraagu sawirkiisa jaldiga ku dhajiyay, laakiin; hadda buugga hortayda ka muuqda ee sawirka qoraagu ku dheggan yahay waan fiirinayaa balantaadiina ALLAHA unaxariisto.!


Haddii aad indhaha la raacdo maktabadda waxaad arkaysaa buug is ciriirinaysa, kuwa kuu yeeranaya si aad u aqriso, kuwa kale si qaab daran ayaa loo raseeyay, buugaagta qaar iyaga oo iska jiifa ayaa midka ku xiga qof qaadanayaa, deetana hurdada ayay ka qasayaan.!

Kitaabka madow oo qudha ayaa si daran iigu yeeraya,waxaad  moodaa in uu inta labada gacmood kor utaagay illeeyahay: xitaa il qooraadka iga milicso,  waxaan ku matali karaa sida arday  jawaabta saxda ah gartay oo macalinka labada gacmoodba u taagaya si warcelintu aysan u dhaafin ama uga fara baxsan.

Waxaan dareemayaa dareen yaab leh waxaad moodaa in dabin qoorta la ii galiyay, in dhanka buuggaas madoow la ii jiidayo, gunta maankayga waxaa ka imaanaysa fikrad ah: ma iibsanayo laakiin; waan eeg eegayaa, doonistaydu buugga isaga ah waxay iigu dhawaynaysaa sida warqad dabayli meel dugsoon ku waddo.

****

((MAGAALADA JACEYLKA MA DEGAAN KUWA CAQLIGA LEH))




Cinwaankaas ayuu buuggu leeyahay, indhaha ayaan ku biniiniyay si aan uga il buuxsado wiilka jaldiga ku sawiran, kadibna…

# 3

Waxaad imoodaa sidii qof waddo goyn rabay oo tareen ku yimid asagoo bartanka wadada taagan, deetana indhaha qabsaday una qaatay inuu dhintay, laakiin; waxba aysan gaarin, codka tareenka xufta igu dhaafay ayaan maqlay, ALLAHA koonka lahoow, waxaani waa geeri oo kale, ALLA! Waa indhihiisii! ALLA! Waa adiga.!

****

Ma ogtahay ? laga soo bilaabo markii aynu kala tagnay ilaa iminkadan noloshaada oo dhan wey igu lammaantahay,waxaan ahay sida faynuus ka dhex ifaysa daaqadda guri laga guuray, iftiinkaas oo dadka wadada maraya jidka tusiya, faynuustaas iftiinkeeda murug ayaa ku dheehan, waayo waxaa ka irdhoobay axbaabteedii, waxaan damcay in aan sawirkaaga laabta galiyo waxaanse soo xasuustay maalin aynu ku kullanay goob qaxwada lagu cabo, deetana; waxaad idhahday xaggee ayaan fadhiisanaynaa?

Deetaana waxaan indhahayga la raacay goobta aynu imaanay aniga oo raadinaya miis banaan oo aynu fadhiisanno,  anigoo baadhitaankii ku jira ayaad si kadis ah iigu yeertay:

Kaalay  halkaan ayaanu  fadhiisanaynaaye, adiga oo ii tilmaamaya miis bannaanaa.

Aniga oo halka aad booska iiga qabatay usoo socda ayaa waxaa iga hor yimid wiilka kabalyeeriga maqaaxida ah, deetana; waxa uu igu yiri:

Xagga  miyaad fadhiisanaysaa? Waxaan ugu jawaabay: wiilkaas ayaan la fadhiisanayaa aniga oo dhankaaga gacanta usoo taagaya.

Wiilkii kabalyeeriga ahaa: halkaas cidba ma joogto walaal, kaliya miis banaan ayaa yaalla.

Deetana; waxaan xasuustay in waxaas oo dhan ay ahaayeen riyo maalmeed aan anigu sameystay, wiilkii kabalyeeriga ahaa waxaan ku iri:

Dhib maleh aniga kaliya ayaa fadhiisanaya, kadibna; waxaan xasuustay qaxwadii aad jecleyd, wiilkii muddalabka ahaa ayaan kaaga dalbay, isaga oo anfariirsan ayuu yiri:

sidaa doonto ayaa laguugu adeegayaa walaal.

Markaan hortaada soo fariistay Waxaan ku waydiiyay: ilaa goorma ayaad I dhibaysaa?

Adiga oo u muuqda inaad xanaaqday ayaad tidhi: is araggeenu dhib fara badan ayuu kuusoo jiidayaa, mar dambe yaynaan is arag waxaan rabaa in aynu nolosheenna sii waddanno innaga oo kala maqan.

Wejigaada  wax is beddel ahi kama muuqan, deetana; waxaan damcay in aan kuu sheego been kaa careysiin karta, laakiin; waxaan ka cabsi qabay in aad xanaaqdo kadibna; aad iga tagto tegid aan soo noqosho laheyn, balse wixi raba ha dhacaane,

Waxaan kugu iri: waxaa jira wiil isoo doontay, waa nin qalbi wanaagsan, hooyadayna waan usheegay in aan doonistaan aqbalay.

“ Alla qofka dumarka ahi may lahaato qalbi sida kan ragga oo kale ah, qalbi intaas oo mashruuc kala agaasimi kara, qalbi ay ku hoyan karaan, kan safarka ah iyo kan nagida ahba,  qalbi aan eryeyn cid walba oo dhaawac nafsadeed qabta, haseyeeshee ALLE dumarka waxaa uu siiyay qalbi carshi oo kale ah, hal boqor ayaa carshigaas ku fadhiisan kara, xitaa hadduu doono boqorkaasi qof xun ha ahaado’e oo aan uqalmin in carshi idil boqor looga dhigo.”

Deetana; wajigayga ayaad ka garatay in aan been sheegayo waana sababta aad udhoolacaddeynayso, waxaadna tiri: waxaad tahay adduunkayga, waxaa tahay waxwalba oo qurux badan

Nasiib darradayda waxaan ahay gabadh iska miskiin ah, waxaan ka caroonayaa wax aan waxba ahayn waxaanan ku raali noqonayaa kalmad wanaagsan oo la idhaho,  dhulka ayaan eegay aniga oo qajilaya, markii aan madaxa sare usooqaaday miiskii aynu ku wada hadleynay ayaan kaa waayay, aniga oo ooynaya ayaan  wiilkii kabalyeeriga ahaa ku iri: waxaan rajeynayaa inaad ii timaado qaxwo kalena ii keento.

****

Weli maktabadda ayaan dhex joogaa.!

Markii aan kitaabka jaldigiisa sawirkaaga ku arkay waan ku dhici waayay in aan buugga taabto, waxaan ka baqay in aad ii naxarisato adiga oo sawir ah, kadibna; aad iga fogaato, oo aan misna ku hungoobo in aan kusoo ceshado, maxaan waqti badan ku beer dareeyay xasuusahaaga iyo kala maqnaanshiyaheenna.!

Waligaa ma tijaabisay? Inta tagtay beerta xayawaannada, sida caadada ah dadka beerta soo booqda waxay khudaar iyo cuntooyin kala duwan siiyaan xayawaannada beerta, xayaawannadaasna waxaa ugu qara weyn maroodi ina cag balaar, marka uu Meesha xayawaanka khudaarta lagu siiyanayo usoo dhaqaaqo ayay xayawaanka yaryari Meesha ka huleelaan, suurayso maroodigaas oo aad gacantaada ku quudinayso oo jirkaagu la jareynayo cabsida aad ka qabto in uu gacantaba afka ku amaago, waligaa cabsidaas oo kale ma la kulantay?

Cabsi middaas ka daran ayaan dareemay markii aan gacanta saar maagay sawirkaaga buugga ku dheggan.!

Waxaan gacanta mariyay dhamman buugga oo dhan aniga oo taswiirta indhaha udhameynaya. markii aan sawirkaaga wada eegay waxaan xaqiiqsaday in adiga uu yahay, arrinta oo dhan dhalanteedkii aan moodayay dhabnimo ayaa ka adkaatay, dhab ahaantii waa sawirkiisii oo aan biyo is marin.

****

Waxaa laga yaabaa in aanad ka helin hadalkayga huuhaada ubadan laakiin; tani waa xaqiiq biyo kama dhibcaan ah.

“nin walba oo guulaysta waxaa ka dambeysa xaas guushiisa ku saacidaysa, gabadh walba oo guuleysatana waxaa guusheeda ka dambeeya nin qalbiga ka jabiyay kana tagay una soo laaban waayay.”

Waan xasuustaa waxaad rabtay inaad noqoto qoraa, waxaadna har iyo habeen u xusul duubnayd in aad buuggaaga koobaad soo saarto, laakiin; waad niyad jabsanayd, naftaada kuma aadan kalsooneyn, waxaa warwar iyo walbahaar kugu hayay dadku waxa ay kaa dhihi doonaan,

Waxaanad ka baqaysay buuggaaga in aysan cidna aqrin, maadaama aan gabadh ahay waajib kayga ugu weyn waa in aan markasta garabkaada ahaado, inaan gacantaada qabto si aad nolosha guulo wax ku ool ah uga gaarto, oo aan kaaga warramo waxwalba in ay ahaan doonaan sidii loogu tala galay maalin uun, iyo in aad maalin uun noqon doonto qoraaga koobaad ee la majiirto.

wax uun qor, hadalkaas ayaan taleefanka kaaga dhahay innaga oo wada hadleyna, markaas ayaad tiri:

-Wax aan qoro cidna aqrin mayso..

Waxaan ku iri: I rumeyso caalamka oo dhan ayaa aqrinaya.

Markaas ayaad tiri adiga oo niyad jabsan: waxaas macquul maaha.

Hadalkaas is dhiibidda ah ayaad dhahday adiga oo lagu moodo in aad dambi uun qiranayso, hadalka ayaad iga kala jartay, adiga oo leh:

Waan fashilmay wax aan qorana cidna aqrin mayso.

Hadal wada is dhiibid iyo quus ah ayaad ku celcelisay, waxaad ugu dambeyntii igu dhahday wax ma fahmaysid miyaa? Waan fashilmay, qofna muhiimad siin mayo wax aan qoro, waxwalbana wey dhamaadeen.!

markaas ayaan kugu iri: anigaa muhiimad ku siinaya, waxaad qorto oo dhan aniga ayaa aqrinaya, aniga ayaa adduunka oo dhan kuu noqonaya.!

Waxaan isku dayay in aan si fiican kuu dhiirigaliyo, laakiin; adiga ayaa igu qayliyay waliba si saa'id ah, markaas ayaa tiri: mawduucaan halkaas ku xir, waxba ma ogid, faashil ayaan ahay dhawr jeer ayaan isku dayay in aan guuulaysto waana ku fashilmay, dhammaan dadku diidmo ayey ii muujiyeen.

Cabaar ayaan kaa aamusay, wax kale ayaad rabtay inaad sheegto, kadibna waad iska aamustay oo hadalkiiba waxaad ku jartay:

Mawduucaan mar dambe haygu furin, inaad wax fahanto isku day.

Xanaaqaaga saa'idka ah waxaa uu gudahayga ku beeray cabsi, wixii aad sheegaysay oo dhan ayaan si dirqi ah uqaatay, aniga oo taada kuu raacaya:

Hagaag waxaa tahay faashil, mar dambana mawduucaan kugu furi maayo, marka aad maqashay in aan ku dhahayo faashil baatahay, xoogaa diidmo yar ayaad muujisay, laakiin; gudaha ayaan kalahaa:

iga raalli ahoow.!

Waxaan ka cabsi qabaa inaan kaa badbatay, sidaa darteed in aan markasto kula soo hadlo ilama hagaagsana, haddabana; waxaan kabaqay haddii aanan kula soo hadal in aad uqaadato in aanan ku daneynayn, ALLAHA halaagana ma dhihi karee, raggu dhib badanaa!

Lama ogaan karo waxa maankooda ka guuxaya, xitaa ragga laftoodu ma yaqaanaan naftooda.!

***

Maktabadda dhexdeeda.!

Dad badan ayaa maktabadda ku jiray wax dhib ahse kuma qabo, laakiin;

Waxaan dareemayay inay awoodaan in ay maqlaan waxa maankayga iyo qalbigayga dhex wareegaya, waxaan goostay in aan Meesha ka huleelo, balse; waan awoodi kari waayay markii aan xasuustay hadalkaagii ahaa: qofna haysku hawl daarin, waa inaad mararka qaar udhaqantaa sida dabbaalada, sababta oo ah; dadka waxaa ugu sacaado iyo farxad badan dadka dabbaalada ah.!

Deetana; waxaan ku waydiiyay, sababta dadka dabbaalada ah dadka ugu farxadda badan u yihiin?

Waxaad kolkaa idhahday hadal aanan ilaawayn waligay oo ahaa:

Dadka waxaa ugu farxad badan dabbaalada, sababtuna waa inay u dhaqmaan sidii la wacan, hadalka marka ay dhahaan kama fakaraan waxa ay dadku ka dhihi doonaan, hadaba; haddii aad rabto in aad faraxsanaato waa in aad mararka qaar dabaal noqoto.

Anigu aad ayaan ugu kalsoonahay talooyinkaaga sidaa darteed waxaan is moogaysiiyay dadkii, waxaanan qaatay buuggaaggii jaldi madoobe ahaa.!

Odayga buugaagta iibiya ee dhabarka godan,  kaas oo u neef  tuuraya sidii qof aad udaalan,  il mugeeed ayuu igu soo eegayaa, wuxuu ii haystaa in aan buugga xadi doono,  sidaa awgeed wuxuu iska dhigayaa inuu miiska hortiisa ah masaxayo isaga oo il qoorta iga fiiranaya, wuxuu isku diyaarinayaa in uu igu soo boodo marka aan ilinka kasii baxayo, odaygaan da'da ah waaayeelnimadiisa kama baran (si kasta oo ay raggu garaadkooda u adeegsadaan in aanay ka badin  Karin dhagarta dumarka.!)

****

# 4

# KA BOODIDDA BADYAR OO AY KA BUUXAAN YAXAASYO GAAJAYSAN.!

ISNIIN.

5:39 PM.

‘’ WALI WAXAAN KU SUGANAHAY MAKTABADDA.”

Markii aan buugaaga gacanta ku dhigay waxaan gacanta mariyay sankaaga iyo indhahaaga aniga oo wali rumeysan la’ xaiiqda i hortaalla,

Waxaan isku dayay in aan timahaaga madaxa iyo kuwa garkaba aan kuu sinsimo, waxaan isku dayay in aan taygaaga iyo suudkaagaba wax boor ah aan ka yool baaro, waxaan gacantayda mariyay wajigaaga sida eyeeyo odaygeedii oo dhintay sawirkiisa gacanta marinaysa oo xusuuso hore kusoo mir kacayaan, aniga oo isla maqan ayuu odaygi maktabbadu iiga saxsaday: buuggaan makaa iibiyaa?

Deetana; waxa aan ugu jawaabay marka hore waan eegayaa bal in uu i cajabiyo iyo in kale?

Odaygii gacan xaad cirawday ay ku taal ayuu saqafka sare ee maktabadda ku tilmaamay isaga oo kawada  halkaan kaamiro ayaa ku xidhan ee hunguri yaanu ku qaadin meeshaan buug lagama xadi karee.!

Waxaan iska dhigay in aanan fahmin waxwalba oo uu odaygu illeeyahay, waxaanan ku iri: lacagtiisa waan bixinayaa haddii uu i cajabiyo.!

****

Maktabaddu waxay leedahay qayb wax aqriska aad ugu fiican oo  lagu qalabeeyay kuraas iyo miisas, halkii kuraasta ayaan udhaqaaqay aniga oo buugaagii jaldi madoobana wata,  markasta waxaan eegayaa jaldiga buugga aniga oo hubinaya in sawirkaagii ku dhagan yahay iyo in kale?

Midka mid ah kuraastii ayaan fadhiistay, labadayda indhood ayaan isku qabtay kadibna; neef dheer ayaan qaatay,  arrinkaygu ma sahlana, waxaad imoodaa in aan diyaarad si kadis ah baal uga gubatay aan iska soo tuuray oo kale, daqiiqaddaas waxaan lamid ahaa qof  ka talaabaya bad yar oo wada yaxaasyo gaajaysan ah.!

****

Intaad iga maqantahay kaliya waxa aan ku dhihi lahaa:

"Wax badan kaama doonayo, kaama rabo in aad riwaayadahaaga igu xusto, mana doonayo in aad dadka la wadaagto inaan ahay qofkii ugu horeeyay ee qoraaladaada rumeeyay, waxa kaliya ee aan kaa doonayo in aanad guushaada sabab uga dhigin in aad i illowday, waxaa kale oo aan kaa doonayaa in aad waqti walba ixasuusato, iyo in aad igu qariso gunta qalbigaaga, waana inaad qalbigaaga iga dajisaa boos aanu soo gaareyn qofkasta oo aad jeclaato igana dambeeya, ixasuuso markasta oo aad ubaahato qof garab kaaga istaaga, si aan kuu qabto marka aad turun turooto,  marka aad subaxdii toosto, deetana; aad weyso cid fariin gacaltooyo kuusoo dirta ixasuuso, markaad cidlooto gadaashaada fiiri waan kula jiraaye, markasto iyo meelkastaba waxaan kuu ahay garab iyo gaashaan dhibta kaaga gudban, ma guul daraysto qofka gabadh garabkiisa taagan tahay xitaa haddii adduunka oo dhan weerar kusoo qaado ama colaadiyo.!"

****

Sida badan gabadhu waxay guusha la rabtaa ciddda ay jeceshahay, laakiin; dooni meyso in uu caan noqdo, wax kale maaha, kaliya inay u maseyrayso,  gabadhu miskiin haba iska dhigto sida xabbad quraajo ah oo gurubsaneysa sonkor dhulka ku daadatay, laakin; kolka ay maseyrto waxay noqotaa bahal dhiigyo cab ah.!

****

Macalimaddaydii iskuulka ee maadada tawxiidka ayaa inoo sheegtay in ALLE habeenka niskiisa dambe soo dego, ducaduna ay mustajaabo tahay,

Deetana; ALLE ayaan ka baryay in marka aad caan noqoto dumarka adduunka oo dhami kuu arkaan daanyeer, sidaasna lagu waayo gabadh aan aniga ahayn oo ku jecel.!

Hddana; xoogaa ayaan murugooday. maaha in aan ducada layga aqbaleyn, ee waxaan ogahay haddii ALLE kaa dhigo daanyeer waxay dumarku kuu arkayaan inaa tahay daanyeerka  daanyeerada ugu quruxda badan uguna soo jiidashada badan.!

****

Wey dhici kartaa in aad waqti badan adduunka sii joogto, sidaa awgeed waxaa dhici karta kadibkay aad gabadh isjeclaataan, taas oo kugu kaalmeynaysa hadafkaaga iyo noloshaadaba, laakiin; ma heli doontid gabadh markasto garabkaaga ah xitaa haddii ay dhimanayso, mana heleysid gabadh garabkaaga ah xitaa haddii jahannamo jid lagaaga dhigayo,

Ma heli doontid gabadh inta aan naf hurnimo kuu sameeyay kuu sameyn doonta, kaliyana waxaas oo dhan usameynaysa in aad faraxdo oo kaliya, sidaa darteed waxaan ahaa fursad noloshaada soo martay oo aan waqtigu mar labaad soo celineyn.!

****

# 5

# CEESAANTII YARAYD EE AAN AQOON DANTEEDA.!

ISNIIN.

8:14 PM.

GURIGA.

KADIB MARKII AAN MAKTABADDA KA SOO LAABTAY.

Beentu maaha wax wanaagsan, markasta oo aan isku dayo in aan been sheego iyada oo aan beentaas laga garan wajigayga iyo codkaygaba waan ku fashilmaa, si kastaba yeelaye been xirfad ka dhigan waayay.!

Imisa ayaan kuu sheegay in aan ku necbahay wajigaaga ALLE dooriga ahna aanan soo hor istaagayn, sababta aan sidaas kuu leeyahayna ay aheyd in aad iskay moogaysiinayso isna kay dhaafinayso, waxaanan kuugu goodin jiray in aan helayo qof ii qalma noloshaydana ku haboon, aniga oo waliba kuu sheegaya in aan kaa tagayo dib dambana aanan kuu xasuusanayn, balse;

Adigu waxaas oo goodi ah dhoolacaddeyn ayaad uga fal celin jirtay, sidii in waxaas oo dhanba ay yihiin hal bacaad lagu lisay.!

waxaan ku dhihi jiray: maxaad la dhoola caddaynaysaa aniga oo ku dhahaya waan ku necbahay?

Deetana; waxaad idhihi jirtay "markaad been abaabuleyso aad ayaad uqurux badan tahay.!"

****

Waxaan kuu qiranayaa markii aad iga tagtay, si waliba bilaa sabab ah, waxaan qadka moobilka ka wacayay saaxibbaday aniga oo ka doonaya in ay iga badbaadiyaan dabinkaan aan ku dhacay ee ka dhashay isa-seegeenna, waxaanan saaxiibaday ka codsanayay in ay iga kaa fogeeyaan,  waxay idhahayeen: kuuma qalmo.!

Waxaan ku iri : haa iima qalmo.

Waxay igu dhahayeen "iskaga tag oo ogoow hadaad ka tagto ineysan noloshaadu istaageyn"

Deetana; madaxa ayaan u ruxayay sida ceesaan aan maslaxadeeda aqoon oo loo talinayo, deetana; waxaan dhahayay: waa run iima qalmo.!

Waxay saaxiibbaday idhahayeen: ka tag oo ogoow waqtigu cidna uma istaagayo si uu ugu booga dhayo.!

Deetana; inta madaxa ruxo sidii qof aan maslaxadiisa aqoon ayaan ka daba dhahayay: waa sax waqtigu qofna uma istaagayo.!

Waxay idhahayeen : doqon yahay ha ujawaabin marka uu kusoo Waco.

Deetana; sidii hore si lamid ah ayaan inta madaxa u ruxo uga daba dhahayay: u jawaabi mayo hadduu isoo Waco.

Madaxayga waxaas oo diginin iyo dardaaran ah ayay ka buuxiyeen, daqiiqad walba oo aan gabdhahaas la joogo waxaan noqonayay naag adag, waxaanan ku qancayay in aan kaa fogaado, waxaan sawiran jiray aniga oo niyadda iska leh, qaabkee ayey waxwalba kuugu qanciyeen?

balse; marka aan arko adiga oo isoo wacaya, waxaan waynayay awoodda maamulka, maankaygu  kama hakan Karin in aan moobilka kaa qabto, marka aad codkaaga maqlo  waxaan ilaawi jiray waxwalba oo saaxibbaday iisheegeen, waxaanan u dhag raaricin jiray waxwalba oo aad idhahayso aniga oo aamusan,  marka aad idhahdo: ma i jeceshahay?

Madaxa ayaan ruxi jiray sidii ceesaan aan danteeda aqoon.!

Aniga oo ku dhahaya: haa! Waan ku jeclahay.!

****

Dad ALLOOW maxaan sameeyaa? Saw ma ahayn middii markasta oo ay kaa tagi rabto kuusoo noqon jirtay, igama ahayn daciifnimo balse;
ma haysan meel aan qalbigaaga ahayn oo aan magan galo Alle ka sokoow, waxaan jeclahay inaad qalbigayga ku jirto anna aan qalbigaaga ku jiro.!

****

ISNIIN.

8:23 PM.

QOLKAYGA.

Buuggaagii jaldi madoobe ahaa ee aan soo iibsaday ayaan boorsada ka soo bixiyay, kadibna aqris ayaan ku bilaabay.!

****

# 6

# ((QORAALKU WUXUU DAWEEYAA XUSUUSTA))

ISNIIN.

9:33 PM.

MARKII AAN DHAMEEYAY AQRINTA BUUGII JALDIGA MADOOBAA.

Waxa aan aqrinayay sixir caadi ah ayuu ahaa, ma garanayo ma buugga ayaa buug fiican ah, mise aniga ayaa jecel qofka buugga qoray.!

Waxa kaliya ee aan garanayo waa in kala taggeennii aad ku noqotay qoraa,

Ma ogsoon tahay? Haddii qadarku iikaa soo celiyo in aanad qoraa noqon lahayn, weedhahaagii intaan wada soconay aan kaa guntay waxaa ka mid ahaa: si aan wax u qoro waa in xanuun aan dareemo.!

Markii aad hadalkaas iisheegtay waxaan ku dhahay: oo sabab?

Waxaad iigu warcelisay annaga oo moobilka kawada hadleyna:

Qoraagu wax ma qori karo in xanuun daran ama murug daran hayso mooyee (xanuunka laga hadlayo cudur maaha ee waa kala taga, iyo waxwalba oo qofka galin kara xusuus dhiig leh)

Dhibta iyo xanuunku waa waxa weedhaha xikmadaysan bakaartooda ka soo saara.! Aniga oo yaaban ayaan ku dhahay: ma xanuun iyo dhaawac?

Markaas ayaad iigu jawaabtay:

Dhibka iyo godku kalama haraan.

Aniga oo yaaban ayaan ku iri: godkuna muxuu ahaa?

Waxaad tiri: qisooyinkii hore waxaa lagu sheega in biyuhu meel god ah kujiri jireen ilaa godkaas afka laga jabiyo biyuhu banaanka uma soo bixi jirin.

Markaas ayaan ku iri: sidaa darteed qoraayada oo dhan markay wax qorayaan ma waxay ku suganyihiin dhibaato iyo xanuun ku qasbaya in ay wax qoraan?

Waxaad iigu jawaabtay: xanuun ay soo mareen xitaa maaha ee markaas ay wax qorayaan xaalad dhib ah ayay wax ku qorayaan.

Hadalkaaga oo dhan waan fahamsanaa, balse; waxaan diidanaa in mawduucaan aad ku sii dheeraato, deetana; waxaan isku muujiyay mid aanba waxba fahmeyn oo dheg weyn ah, waxaan rabay in mawduuc kale oo igu socon kara aad iiga sheekayso, arrintaan gabadhu waxay samaysaa marka ay doonayso nin ay jeceshahay in ay saacado badan la sheekaysato.

Si ogaan ah ayaan kuu dhahay: waxba ma fahmin.

Markaas ayaad tiri: dhibaatadaaduba waa in aanad waxba fahmeyn, si fudud ayaan wax kuugu sheegayaa!

Jariiraco ayaa iga duushay, ma garanayo ma waxaan ku farxaa in aan ku guulaystay dheereynta wada hadalkeenna?

Mise waan xanaaqa maadaama aad igu tilmaamtay qof dheg weyn ah oo aan waxba fahmeyn xitaa arrimaha la wada yaqaanno?

Si kastaba ha ahaato afka ayaan xirtay waxaanan gudagalay in aan dhegta kuu raariciyo.!

Hadalkii ayaad sii wadatay:

Qoraalku waa daweeyaha xasuusaha murugada ah, waxaan wax u qornaa in aan ku daweyno boogo aan wax qorid mooyee wax kale daweyn Karin.!

Markii uu dhaawacaasi bogsoodo wax walba oon dhaawacaa kadib qorno macno yeelan maayaan.!

Sidaa darteed ayay qoraayadu u baaraan xanuun iyo dhaawac qalbiyeed oo ka saacidi kara inay wax qoraan markasta oo ay rabaan in ay kitaab cusub soo saaraan.!

Waxaan damcay in aan wali ku dhaho ma fahmin, haddana; waxaan ka baqayay fal celintaada aan hagaagsanayn, deetana; waxaan iri:

Waan fahmay.!

****

Ma aqaanno ma nin xun ayaa tahay? Mise ragga oo dhan ayaa dabcigaan leh.!

Adigu waxaad tahay ninkii ugu horeeyay ee  qalbigayga dega, waxa kaliya een hubo waa in aan ku jeclahay, inaan ku jeclahay oo kaliya ayaa iigu filan in aan waxwalba oo dambi ah oo aad iga gasho kaa saamaxo.!

Wax cudur daar ah uma baahnin marba haddii aan qofka jecelnahay, jaceylkuba waa inaad qofka aad jeceshahay waxwalba udhaafto adiga oo aan cudur daar ka sugeyn.!

Hagaag! Marka aan ku canaananayo macnaheedu maaha in aan ku necbahay, mana ahan in aan rabo in aan mushkilad kuu abuuro sida aad adigu mararka qaar uqaadato, ee waa inaan ku jeclahay, oo aanan dooneyn inaan kaligay noolaado.!

Sida saxda ah dumarku waxa ay canaantaan ciddda ay ahmiyad gooniya siinayaan, oo aysan awoodin in ay la'aantood noolaadaan.!

Waxaa waajib kugu ah in aad iga digtoonaato marka aan inta gaf kugu arko indhaha kaa laliyo, asalkaba waa in ninku kun jeer is xisaabiyo marka ay gabadh is jecel yihiin, maxaa yeelay? Sida caadada ah gabadhu canaanta madayso mana aamusto inay garato mooyee in aanu hadalku waxba soo kordhineyn, kala tagguna uu yahay xalka kaliya ee furan.!

****

Waxaa ugu daran gabadhu marka ay si dhaba u go'aansato inay kaa tagto, dib dambe usoo laaban mayso,  haddii ay kuu soo laabatana waa mid ka geddisan middii hore.

****

Adigu! Wax jaceyl ah igalama aadan hadli jirin sanadkii mar uun mooyee, marki aad ogaatay in aad gaf weyn  iga gashay ayaad jaceylka i xasuusin, aniguna markasta oo aan rabo in aad jaceyl igala hadasho aniga oo aan is dhibin ayaan kaa xanaajin jiray,  inkastoo badanka aad iska aamusan tahay, laakiin; labadaada indhood ayaa waxwalba ka dheehan jiray, markasta oo aan indhahaaga eego waxaan ka dheehan jiray in aad si dhab ah ii jeceshahay.!

Aniguna:

marka aan dadka ku dhex jiro ma hadal badni,  qosol badanna layguma yaqaan,  mana jecli in laga hadlo wax aan macno weyn lahayn, badanka waxaan iska ahaa qof iska aamusan ilaa hadalka lagu bilaabo, laakiin; marka aan kula joogo wax walba si kale ayay noqdaan.

Markaan kula joogo:

waxaan ahay qof hadal badan oo aan aamusi Karin, waxa ugu yar een lagu qoslin ayaan ku beer casaadaa (aad ugu qoslaa).

marka aan kula joogo:

markaan kula joogo waxaan ahay sida xabad sonkor ah oo qaxwo lagu dhex riday, ag joogaaga waan ku milmaa.!

Waxaan ahaa gabadh caqli badan oo inta ay kula joogto garaadkeeda meel iska dhigta kana tanaasusha.!

Waxaan ahaa gabadh aan qofna howlahiisa gelin, laakiin; adiga wax walba ayaan kaa daneeyaa, waxaad imoodaa sida gabadh yar oo soo luntay si kadis ahna qof ku aqoonsatay kadibna; inta hor istaagtay indhah ka mirig mirig siisay.!

Waxaan ahay gabadhii madaxa adkeyd ee kaa xanaaqi jirtay, haddana; aan kaa tagi jirin, waxaan kuugu dhaaran jiray in aan cashar adag oo aanad waligaa ilaawin kuu dhigi doono maadaama aad qaladaad badan iga gashay, laba daqiiqo kadib; ayaan haddana; dib kuugu soo laabta sidii bisad guri jooga.

****

Haddii qofku markuu been sheegaba sankiisu dheeraado hal mitir, nin walba wuxuu u baahnaan lahaa kumanaan mitir si uusan ugu dhicin ninka ka horreeya.!

Si kastaba ha ahaato'e haddana; waxwalba oo aad sheegto waan rumeysan jiray xitaa haddiii aan ogahay in waxaas been yihiin, markaad iisheegtay in aad iguursanayso inta kitaab jaamac ah kuu dhiibay ayaan shan jeer ku dhaariyay si aan urumeysto waxa aad ii sheegayso, waxaas oo dhan waxaan usameynayaa in ragga bariga dhaxe ka soo jeeda ay aaminsan yihiin in ay jirto gabadh la guursado iyo mid jaceyl lalajilo, markii ay gabadh jeclaadaan waxay go'aansadaanba inaysan gabadhaas guursaneyn, ayse guursan doonaan gabadh ay hooyadood udoortay, gabadh aysan waxba ka aqoon, kaliya habeenka guurka ayay masraxa arooska si fiican iskugu arkayaan.!

****

Nin walba oo aan wax jeclaan ama hadda wax jeclaan raba waxaan leeyahay: isku day in aad ka fogaato inaad gabadh jeclaato, sababtoo ah jaceylku maaha in habeenkii saqdhexe hadallo macmacaan la is dhaho ee waa: kalsooni, axdi, iyo qadiyad Sharaf ah oo ay ceebi kaa raacayso haddii aad ka ganacsato.!

Dhibmaleh! Hooyadaa gabadh  ha kuu doonto, laakiin; waxaa shardi ah in aanad heysan qalbi gabadh miskiin ah aad kasoo jeeb siibtay, raganimada meelna kagama sugna inaad hoojiso gabadh dartaa caalamka oo dhan u holcin karta.!!-

****

# 7

# ((MARKII AAN KU ARKAY WAXAAN INKIRAY WAXWALBA OO AAN AAMINSANAA.!))

Markii aan dhameeyay buuggii, waxaan gashatay buursadayda gacanta, waxaanan dareemay inaan hilow kuu qabo, sababtoo ah; dartay ayaad wax usameysay adiga oo awooda in aad gabadh kale iga door biddo, jaceylku maantay waa badeeco suuqa loogu gado jumlo iyo tafaariiq.

Buuggaagu wuxuu u ekaa is dil, dadka oo dhan ayaana kugu soo weerari doona, dad badanna wey kaa caroon doonaan, waxaaba laga yaaba in kuwa dadka kuugu dhaw ay kugu tilmaamaan munaafaqnimo, isla dadkaas ku eedeynaya waa kuwa ugu badan ee haadaanta jaceylka ugu hoobtay sidii xasharaad dab arkay.!

Waana dadka ugu badan ee jaceylka ka baqa kana carararaya, si fiicanna uma dhugtaan waxa ay ka cararayaan, adigu markaad baadhitaan ku sameysay dadka jaceylka naqdiya ama ka orda waxaad caddeysay in ay ahaayeen dad qiimaha jaceylka yaqaanay kana run sheegi jiray, laakiin; waxaa asiibay xanuuno fara badan oo kaga yimid dadkii ay aamineen taas ayaana sababtay in aysan cid dambe ku kalsoonaan, meeshii jacayl lagu sheegana ay weerar ku qaadaan.!

****

“waa in aan ogaannaa dhibku jaceylka maaha ee waa doorashadeenna hore oo qaldaneyd, dadka qaar waxaa jira haddii indho garaad leh lagu eego laga cuudi billaysanayo, kuwaas oo jaceyl loo qaado kawarran? Dhibka taaganba waa intaas.”

****

Sida xaqiiqda ah!

In asxaab la ahaado waa doorashada ugu fiican, waxaanan aamisanahay in dadka garaadka lihi aysan uqalmin inay ku dhacaan dabinka jaceylka,

Aragtidaas ayaan qabaa in ka badan inta aan qabo aragti kale oo ah in banii aadamka muhiimadiisuba tahay inuu kaligii ahaado, adduunka waxa uu yimid isaga oo kaligii ah, waxaanu ka tagayaa isaga oo kaligii ah, waxaana aakhira la xisaabinayaa isaga oo kaligii ah.

Waxaas oo aragtiyo ah waxaan lumiyay markii aan kula kulmay, waxaanan rumeeystay aragti waxaas oo dhan lid ku ah oo ah:

Jaceylku waa qadar ALLE waana imtixaan, ALLANA hadduu addoonkiisa jeclaado wuu imtixaana.!

****

In aan wax qoro waa macquul.!

Waan ku adkaysanayaa in aan wax qoro, mase hubo in waxa aan qoro ay ku soo gaari doonaan, ma suuro galbaa in aan dhambaalo iskaga kaa soo dhiibo? Oo sida maqaaxiyadu dadka cunta ugu soo dhiibaan oo kale ma kuugu soo dhiibaa qof aan ku garaneyn?

Waxaan isku dayay in aan sidaada oo kale dhambaaladayda daabaco,

Laakiin; yaa iidaabacaya?

Madbacaddee ayaase daabacaysa dhambaaladaan murtida aan lahayn?

Xitaa haddii ALLE madbacad ii sahlo sawirkayga kuma dul dhajin karo sida aad adigu yeeshay oo kale, inaan sidaas sameeyo geeri ayaan u arkaa, waxaas oo guul darro ah aniga oo dareemaya ayaan haddana; qalinka ku duugay in aan wax qoro xitaa aanba naftayda uhaysto oo yaanay cidiba daabicine.

waxaaba dhici karta in aan kala jeexo marka aan dhameyo, muhiimaddu waa in aan qoro, sidaad hore ii bartayba wax qoriddu waa daawada xusuusaha murugada leh.!!

# DHAMBAALKA LABAAD EE GABADHII MAGACEEDU KU DHAMAANAYEY XARAFKA “T” XIRAN (ة).!

**WAXAA WAAJIB AH IN AYNU AHAANO SAAXIIBO, MAXAA YEELAY JACEYLKA CUMRIGIISU WUU GAABAN YAHAY.!**

Mid ka mid ah dadkii hore ayaa yir:

“ gabadhu waa makhluuq cajiib ah,  shimbiraha waxaa ugu qurux badan daa’uuska, Ugaadhana waxaa ugu qurux badan deerada,

Bani aadamkana waxaa ugu qurux badan gabadha, maxaa yeeley mar waa hooyo marna waa walaashaa, marna waa xaaskaaga,  haddana waxaa laga dhigay waxa ugu wanaagsan ee jannada laysku abaal mariyo.”

Waxaa jira qof marka aynu aragno aynu dareenno in noloshu qurxoontahay, aragtidiisuna inoo waxyoonayso in farxadda koonka aan gacmaheenna ku haysanno,  waxaan kuu jeclaaday sidii in adduunka aad adigu rag ka hartay, waxaan kuu jeclaaday sidii in la iclaamiyay maalinta qiyaamuhu dhacaayo,  waxaad tahay yididiilada kaliya ee aan haysto ee dadba aan uga go'ay, laakiin; waxaan hilmaamay in farxadda waqtigeedu gaaban yahay,  qadarkuna uu yahay sida ugaarsade xirfad badan, kaas oo dabin udhiga qof walba oo aynu jaceyl ku ogaanno.!

Waxaan badanka is waydiiyaa ma dhagri karnaa qadarka? Oo ma isku muujinaa sidii kuwo saaxiibo ah oo aan wax jeceyl ahi ka dhaxeyn.

Ma dhici kartaa in markaas qadarku  mujaamaladeenna inagu daayo oo aanu dan iyo heello inaga yeelan?

Imisa ayuu qadarku meel dheer inaga soo dhagrayaa innaga oo moogeyaal ah,  imisa ayaanse usamreynaa kala maqnaanteenna?

Si kasta oo qadarku inoo kala kexeeyo kawarran haddii aynu isa sii jeclaano inaga oo isa seegnay?

Qadarku waxa uu doono ha qaato innagu saw dib uma wada midoobi karno?

**Waxba kaa qarin maayo, ee waxaan jeclahay in aadan haweenka adduunka oo dhan is fahmin, si aanad ugu guuleysan in aad aniga i illawdo, xitaa haddii aynu kala irdhawnay.**

ha murugoon haddaan isa seegnay aad uma kala fogaanayno, waxaan kaa eegayaa meel aanad iiga jeedin, kala taggeenu maaha kala maqnaan ee waa wax yar oo kala fogaansho ah, si aan dusha ogala socdo dhammaan waxyaabaha aad sameynayso intaanu kala maqannahay.!

Gacantayda ayaan hawada utaagayaa, si dhalanteed ah ayaan gacantaada ku salaamaa, waxaan dhunkadaa hawada magaalada waa intaas oo aan dhunkashada la helaa dabayl wajigaaga soo martay.!

Waxaan u yeeraa shimbiraha: usheega shimbiroow in aan jeclahay oo aanan waligay illaaweyn, waligii wuxuu ahaan doonaa waxwalba oo wanaagayga ah iyo waxwalba oo ii qurux badan.

Shimbirahaasi dhankaaga ayay usoo kicitimayaan iyagoon iweydiin cinwaanka gurigaaga sababtoo ah indhahayga ayay ka garteen, laakiin;

Markii ay shimbirahaas ku arkaan adiga oo aamusan garkaagana tifaya waxba kulama wadaagaan,  waa uun sidii aan kaaga aamusi jiray markii aynu daaqadda istaagi jirnay kolkaan arko inaadan hadal rabin.!

Si kastaba ha ahaatee shimbirahaasi kaagama aamusayaan in  aadan la hadleyn,  kaagama aamusin in ay hilmaameen wixii aan soo faray, kaagama aamusin in ay kaa khajileen markii ay ku arkeen, balse;

haybaddaada ayaa hadalkii ka hor istaagtay, siidii ay anigaba iiga hor istaagi jirtay, een adiga uun kuu dhageysan jiray.!

**INTA AADAN KA FIIRSAN DADKA AAD JECLAANAYSO  KA FIIRSO DADKA AAD SAAXIIBADA KA DHIGANAYSO, SAAXIIBADAAS AYAA HADHOOW KAA BADBAADIN DOONA DABINKA JACEYLKA XUNE.!**

Marka aynu qof isku dhejinayno, maaha in aynu ka baqayno in qofkaasi innaga tago, cabsi innaguma hayso in aan qofkaas weyno, dhibna naguma ahan in aan kaligeen noolaanno, waxa kaliya ee aanu ka cabsanayno waa hilowga kala tagga ka dambeeya, xitaa haddii aan is hilmaam siinno kala tagga lama hilmaami karo.!

"hilmaamku waa been uu banii aadamku sameystay, qofna wax ma hilmaamo, ee qof walba waxa uu isku muujiyaa in uu wax hilmaamay,

Dadkii aynu kala tagnay waxwalba waan ka og nahay, balse;

Waan kala tagnay, dad kale oo ka dambeeyay ayaanu la jaan qaadnay, sanado kadib;

Meel uun baynu ku kulmi doonaa laakiin; weynu is dafiri doonaa, inkastoo nafaheennu hilow isku qabaan haddana qof kasta mooge wax walba daaqadda qolkiisa ka tuuray ayuu iska dhigayaa, si quman iskuma eegayno, ismana waydiinayno qof walba qofka uu helay kala taggii kadib.

Tani waa sunnada qadarka, soo galooti  ayaynu isku noqonaynaa, haddana dad uun axbaab ahaan jiray ayeynu nahay, marka u dambaysana waxwalba sidoo dii hore iyo xusuus ayay noqonayaan oo is moogeynsiintu Meesha wey kabaxaysaa.!

**WAXA UU KU YIRI:  WAXAAD TAHAY DHAB AHAANTII DHAQTARAD, WEY DHOOLACADDEYSAY MANA AYSAN FAHMIN UJEEDKIISA, WUXUU KU YIRI:  MARKAAN KAA FIKIRAYO CAAFIMAAD AYAAN DAREEMAA.!**

Waxa ugu badan ee ina xanuujiya kala tagga kadib waa inaan uhaysano in dadkii aynu kala tagnay weli aynu wada nool nahay, innaga oo sida xaqiiqda ah kaligeen nool, riyooyin badan ayaan moodnaa in dadkaas aynu kala tagnay aynu wada rumeyn karno, balse dadkale ayaan riyooyinkaas la dhameystirnaa, waxwalba malahaas aysan waxba ka jirin ayaan dul qotominaynaa, mar dambe ayaan ogaannaa in malaha qaarkiis uu yahay dambi.

Suurayso adiga oo waayeel ah oo aad iisheegayso in dhabarkii kusoo gotay, lafa xanuunkiina xoogaa aad ka roonaatay maadama aad daawo badan cuntay, oo aad haddana ii sheegtey in dhaqtarku ku yiri: waad caafimaad qabtaa, waxwalbana wey hagaagayaan.

Kolkaas aad waayeelka tahay xanuunka oo dhan daawadaas ayaa lagaaga waardiyeynayaa, waxaad iisheegaysaa in aad caafimaad qabto, laakiin; ma caafimaad qabtid ee aniga ayaad walbahaarka ii diidaysaa, balse; inta dhoolacaddeeyo ayaan wax walba ka aqrisanayaa labadaada indhood , waxaan dhaayahaaga ka dhex arkaa in aad cabsanayso.!

Gacantaada jaraynaysa ayaan qaban, deetana waxaan markaba arkay fargalka uu isla sidii magacaygu ugu qoran yahay,  garabkaaga tabarta yar ayaan madaxa saari lahaa, inkastoo uusan sidii hore awood ulaheyn

Haddana; amni xad dhaaf ah ayaan ku dareemayaa oo aanan waligay ku dareemin, deetana; waxaan ku odhan: ha cabsan aniga ayaa la jirkaaga ah.!

Markaad ogaatay in aan aqriyay waxwalba oo indhaaga  ku qoran ayaad cod hoose igu tiri: WAAN KU JECLAHAY.!

**Waxaan isku muujiyay sidii qof gadaashiisa wax ka shanqareen, si degdeg ah ayaan dhabankayga usoo dadbay oo aan kuu soo eegay si aadan u arag waayeelnimada dhaban kayga haraysay, waliba aniga oo maqlay hadalkaagii ahaa waa ku jeclahay, waxaan noqday ayeeyo xitaa abooto ayaan noqday laakiin; markasto waxaad ileedahay waan ku jeclahay, oraahdaas ayaa dhabankayga dhalinyaro ka dhigaysa weyna iga xishood siisaa.!**

**MAADAAMA AAD IGU KALSOONAATAY, WAXBA HAKA BAQIN, AMAANADEYDA AYAAD KU JIRTAA INTA AAN KULA JOOGO.**

Dhammaantood wey igu jees jeesayaan, dhammaantood wey i yasayaan, sababtoo ah ma dhagaysan markii ay dhammantood iigu dhaarteen in aanad waligaa  la jirkayga ahaaneyn,  maalinna ay imaan doonto aad iga tagi doonto, usheeg in aanan doonistayda kaaga tagin, usheeg in aad ijeceshahay,  usheeg in aad iga fekerayso,  wax uun dheh xitaa been,  si ay afkooda dhankeenna uga jeediyaan.

Qaar ayaa si yasmo ah gadaashayda uga dhaha:  jidka hanuunka yaa yaqaana? Waxaan tusi lahayn qof sheeganaya in uu qof hilmamay balse; aan waxba hilmaamin.

Yaa iga saamaxaya indhahaygu in ay ku arkeen,  si aan ujoojiyo baadhitaanka aan kaa dhex raadinayo safarrayda iyo soo galootiga magaalada.!

Yaa isiiya awood aan uga xeeladaysto qalbigayga si uu uga joogo raadinta uu adiga ku raadinayo?

Sideen wadnahayga garaaca uga reebaa markasta oo uu maqlo magac kugu sami ah?

**HORTAA MA AANAN DAAWAN JIRIN FILIMADA HORORKA AH, BALSE; ADIGA WAAN KULA DAAWADAY SI AAD LAABTAADA IIGU XAJISO MARKASTA OO WAX ARGAGAX LEH SOO MUUQDAAN.!**

Ma ihi gabadh wanaagsan,  laakiin; waan jeclahay inaan noqdo gabadh fiican,  salaadda kama tago, laakiin marmar waan dib dhigaa,  waxaa laga yaabaa in aad iminka igu aragto aniga oo hees ku Jaasaya,

Cabaar kadibna waxaad I arki aniga oo muxaadaro diini ah madaxa la ruxaya,  dambiyo badan ayaan galay, laakiin naftayda ma bari yeelayo,

Waana dhaadanahay in aan gafay,  mushkiladdaydu waan in aan ALLE ku xasuusto inuu yahay dambi dhaaf badane, aniga oo hilmaamaya in uu yahay ciqaab badane.!

**Ninku waa sida canug yar, marka uu arko aalad lagu ciyaaro wuxuu xoogiisa iskugu gaynayaa in uu aaladdaas helo, markasta oo helidda aaladdu adkaato aaladdaas lagu ciyaarayo waxay ula muuqanaysa mid qiimo weyn leh,  balse marka uu helo dhawr maalin marka uu ku ciyaaro wuxuu ku dareemayaa caajis iyo daal waxaa uuna iska dhigayaa geeska fog ee qolkiisa, wuxuuna raadinayaa aalad kale oo lagu ciyaaro oo cusub ama mid uu horey u tuuray.**

**MARKA AAN IS JECELNAHAY! WAAJIB MAAHA IN AAD IKHIYAANTO SI AAN KAAGA TAGO, KALIYA WAXAA IGA BADAN IN AANAN AGTAADA KALSOONI KU DAREEMIN.!**

Sideen kuu hilmaamaa waxkasta adiga ayay ikaa tusayaan, sida arday ku sugan hoolkii imtixaanka oo saaxiibkii uqishaya jawaabta saxda ah, fikraddii ahayd in aysan noloshu macaan lahayn dhoolacaddeyntaada la'aanteed sida ducada hooyadey oo kale hadda waxay noqotay ma dhalays.! Saw xanuun maaha haddii aad iska faraxdo oo qofkii farxaddaada sababta u ahaa uu kaa fogyahay.!

Ka warran marka aan maqlo moobilkayga oo dhacaya,waxaan u boodaa sida dabagaalle beerta xayawaanka jooga oo cunug beerta soo booqday si kadis ah uga nixiyay.

Suurayso innaga oo intaas oo sano kala maqneyn wali haddana waxaan habeen saqdhexe kaa sugayaa farriin sidii caadada inoo ahayd aad ku sheegayso in aad saa'id ii jeceshahay.! Waliba in aan ahay waxwalba oo kuu qurux badan.!

**UMA BAAHNI IN AAN CODKEYGA SARE U QAADO SI AAD AHMIYAD II SIISO,  WAXAA IGU FILAN KALIYA IN AAN SI DEGGAN KAAGA TAGO, WAQTIGA AYAA KAAGA WARRAMI DOONA  GAFKA AAD SAMEYSAY, SABABTOO AH WAAD I WEYSEY.!**

Xiriir walba oo jacayl ah  waxaa ka dambeeya xiriir kale oo aan macno badan ku dhisneyn,  qof aynaan garanayn ayaan xiriir degdeg la sameysanaynaa,  xitaa hadduu xun yahay xiriirkaas waanu la sameynaynaa caro aynu ka qabno xiriirkii inaga soo burburay,

Waxaan udhaafnaa gafaf aan laysku dhaafi Karin,  dhib iyo dheelahawba waanu ka ilaalinaa,  marka aynu xaqiiqsanno in qofkaasi ku dhacay dabinkii jacaylka ayaan sameynaa mushkilado aad  u yaryar, kadibna si deggan ayaan uga tagnaa, sidii inuu yahay warqad aan wax dambe lagu faleyn.!

Maalin uun ayaad adiga oo kaligaa ah ogaanaysaa in dadka xun ay yihiin dadka dadka ugu wanaagsan ugu saamaxaadda badan uguna gobonimada badan,  xumaantana wax uunbaa ku keenay,

Dhammaanteen waxaan nahay sida qaruuradda, dhaqsi ayaan u jebi ognahay,  laakiin; marka qof ina burburiyo waxaanu la mid nahay sida dhaladaas jaban oo aanay cidna gacanta u dhaweyn Karin.!

**TALO KU SOCOTA NIN WALBA OO ISLA WEYN: GABADH WALBA OO KUSOO EEGAYSA HA U QAADAN IN AY KAA HESHAY, WAXAA LAGA YAABAA IN AY RAADINEYSO LABA KABOOD OO DUUG AH OO AY SHAQADA DHIBKA BADAN EE GURIGA KU QABSATO.!**

Waa laga yaabaa in gabadh ay saaxibadeed hortooda ka dhahdo: jaceylkaygii hore haanta qashinka ayaan ku riday, isla marka ay gabadhaasi kaligeed noqoto ee ay xasuusato jaceylkeedii hore iyada ayaa haanta qashinka inta lugaheeda ku doonato ka raadinaysa jacaylkeedii hore.! Isla iyadii diidanayd ayaa dib usoo baadi goobeysa.!

Kibirku waa in aad ku celceliso "waan wanaagsanahay" qalbigaaga oo ay kun hurgumo iyo dhibaatooyin ahi dhex hoganayaan, kibirku waa in aad ka dhaqaaqdo qof aad jeceshahay markuu kaa galay gaf aanad saamixi Karin, kibirku waa in aad cisiga naftaada ka dhigto qiimahaaga koobaad hadduu rabo qalbigaagu ha burburo'e.!

**WUXUU YIRI:  WAAN KUU HILOOBAY.!**

**WAXAY TIRI: ANIGUNA WAAN KUU HILOOBAY, BALSE WAAN KALA TAGNAY.!**

**WUXUU YIRI:**

**KAWARRAN HADDAAN CAAWA IS ARAGNO, MAADAAMA KIBIRKEENNU DIIDAYO INAAN DIB ISKU ARAGNANA AAN KULANKEENNA DHAHNO SI KADIS AH AYAAN ISKU ARAGNAY.!**

Xumaantii aad habeen hore gashay ee aad maanta ku mashquulsan tahay ma baabi'i doonto, ee waxay kuu soo noqon doontaa mustaqbalka ee ha sugi waayin.!

Fariintaan ha gaarto kuwii sida bareerka ah inuugu gafay, ee aynu saamaxnay, ee haddana nagu gafay, ee hddana aynu saamaxnay, saamaxaaddeenu daciifnimo maaheyn ee waxaa uu ahaa naxariis iyo damqasho.!

Dhammaan kuwa aad maanta u jeceshahay si dhab ah, berri ayay si daacadnimo ah kuu khiyaanayaan kuuna dhibaataynayaan.!

## MARKA AAD DAREENTO DADKA IN AAD CULEYS KU TAHAY KA DHAQAAQ OO LA GUUR KARAAMADAADA INTA AAN LAGAA GUURIN.!

Qof hadal adag noqo qofkasto wuu kaa haybaysanayaa, tijaabi in aad noqoto qof wanaagsan qofkasto jilaafo ayuu kuu dhigayaa.!

Dadka qaarka loo nuglaado waxay umaleeyaan daciifnimo, waase dad aan nolosha waxba ka ogeyn, maba oga  in qofka maanta wanaagsan beri mahlig isku baddali karo,  bal tijaabi oo niyadda ka  jabi qof wanaagsan waxaa uu isku baddalayaa jinni geeso leh.!

Markaan kaa caroodo waxaan kuu sheegi jiray in aanan ku saamaxayn,

Haddana; waad ii imaan jirtay sidii canug hooyadii raadinaya, adiga oo iska dhoola caddeynaya, waxaadna ihorkeentaa cudurdaar aan macno lahayn, aniga oo aan ka labalabeyn ayaan hore kaa saamixi jiray,

Kuuma saamixi jirin in aan gabadh fiican ahay ee waxaan kuu saamixi jiray in dhoolacaddeyntaadu waxwalba i ilowsiin jirtay.!

**ANIGU WAXAAN AHAY QOF XUSUUSTIISA WEYNAYA MARKA UU KIBIRKEYGU I DAMQIYO, HADDII AAD GAF IGA GASHAY KALIYA SI EDEBSAN IILA HADAL OO DEGGAN, SI AANAN GEBI AHAANBA KUU HILMAAMIN.**

Waxaa laga yaabaa beertiinna geed ku yaalla in uu xididkiisu dhulka hoostiisa aad ujeexo, isaga oo raadinaya dhibic biyo ah, geedku dambi maleh ee adiga ayaa dambiile ah oo waraabintii ka daayay, sidaa darteed haku daalin in aad si daran u daba gasho, adigoo iska dhigaya in aad i ilaalinayso, kaliya waxaan kaa rabaa waxyar oo ihtimaam ah,

Intaas yar haddii aan kaa helo waxwalba haddii ay dhacaan garabkaaga ayaan ahay.!

Raggu dumarka wey ka awood badan yihiin waxaa laga wadaa:

Inuu quudiyo ayaa laga rabaa.

Inuu masuuliyaddeeda qaado ayaa laga rabaa.

Inuu dhawro oo ilaaliyo ayaa laga araba.

Awoodda lagama wado in dumarka lagu amar ku taagleeyo sida ayaguba inoo khiyaanaan, waa sida rag badan moodaane.!

Wey iskaaya moogeysiinayaan, oo naga fogaaanayaan, ilaa aanu guurno, maqnaantooda ayay nolosheenuba ku qurux badnaataa.!

Markaan ka maaranno ayay inaga dalbanayaan in aan dib ugu soo laabano, qosol iyo qaraaxo badanaa.!

# WUXUU YIRI: JACAYLKAYGI II TIMID MARKAAN ALLE KA MAGAN GALAY SHARTA MAQNAANSHIYAHEEDA, HADDII AY II TIMAADANA AAN IGA TAGEYN.!

Bariga dhexe  habeenkii jaceyl ayay iskula joogaan subaxdiina wey ka cuudi bilaysanayaan,  ma aqaanno  cidda umeerisay jacaylku waa dambi ay hay'ahadaha dawladdu dadka ku ciqabayaan,  mana garanayo cidda ubidhaamisay qofkii wax jeclaada dambi barista ayaa gal la daba kacaysa iyo laamaha booliiska.!

Bariga dhexe wali waxaa ku nool ABII LAHAB, dadka waxaa uu usheegayaa in gabadhu dambi ka sameysantahay, ninkana dambigiisa hore iyo kiisa dambaba waa la dhaafay.

ALLAHAYOOW RAGGA BARIGA DHEXE BAR JACEYLKU INAANU DAMBI IYO CEEB AHAYN.!

ALLAHAYOOW RAGGA BARIGA DHEXE BAR GABADHU INAANAY CEEB LAHAYN  AYNA TAHAY SHARAF IYO WAX LAGU FAANO.!

Ragga ku tartamaya inay dumarka xumeeyaan wax ay ugeysteenna iskugu faanaya ibliis ayaa soo salaamayay wuxuuna yir: hawl fiican oo bogaadin mudan ayaad haysaan waanan idinku faanayaa ee halkaa kaga sii haya.!

# GUURKA KADIB RAGGA QAAR AYAA INDHO BEELA OO XAASASKOODA KA DOOR BIDA GABDHO ISLA WAREEGOOYIN AH.!

Ka digtoonoow qof aad is jeceshihiin oo ku dhahay: ma rabo inaad maseyrto?  haddii aanay lug ulaabnayn ma diideen in loo maseyro.

Jaceylkeygiyow Hadddii aan saaxirad ahaan lahaa ama sixirku banaanaa lahaa ushayda  inta kugu dhufto baan waxaan kaa dhigi lahaa rah cagaar ah,  waxaan kugu xiri lahaa dhalo aanay Karin xabadu oo ciriiri ah, kadibna cadaro aan gado ayaan kugu dhex dari laha, ha walwalin galab kasto waan ku soo booqan lahaa,  intadhalada yarta ah kugu soo qaado ayaanu socod gaaban gali laheyn, ha udhoolacaddeyn gabdhaha kale haddii kale ilkaha quruxda badan ayaan biinso kaaga siisiibayaa,  ha milicsan midig iyo bidix si aanad u arkin gabadh kala daaadsan oo war moog ah.!

Jacaylkaaga hadda kuu maseyraysa haddii aanad tix galin waxay isku baddalaysaa shaydaan laga cuudi bilaysto.

**MARKA AAN KAA XANAAQSANAHAY EE AAN KU DHAHO WAAN SEEXANAYAA, HA II FILIN IN AAN HURDO FIICAN SEEXAN KARO, EE WAA DHAMBAAL WAXAANA KAWADAA "HADDA IWANAAJI.!"**

Waxaa wax laga xumaado ah in diyaarad ay duusho oo dadka oo dhan moobiladooda la soo baxaan si ay diyaaraddaas sawir Uga qaadaan, balse cid ahmiyad ku siinaysa aysan jirin, waa wax xanuun badan in aad waqti firaaqo ah haysato balse waqtigaas aaad ku dhameysato kalinimo, maxaa yeeley cidna kuma danaynayso, waa xanuun in aad kaligaa daalantahay oo kaligaa aad dareemeysid xanuunkaada, sababtoo ah cidna arrintaada ma danaynayso.!

Waxaa kale oo xanuun ah in aad raadiyaha ka shido gabay ama geeraar cajiib ah balse aadan haysan cid aad uhadyadayso,   waxaa kale oo dhabar goyso ah in qof dadka kamid ah kula soo wadaago murug aad u weyn  deetana aad weyso cid laabta ku galisa,  waxaa  tiiraanyo  ah in waayuhu isku kaa dhiidhiibaan deetana; aad weyso cid aad gabaad ka dhigato,   waxaa kale oo xanuun ah in aad habeenkii kaligaa seexato kadibna; marka go'u kaa dhaco aadan haysan cid go'a ku huwisa,  ee ku dhahda go'a ayaan kuu huwinayay.!

Is waayidaas kedib waxay ku kulmayaan maqaaxi sanado  badan kadib si lama filaan ah asigoo caruur leh iyo ayada oo caruur leh,   laakiin; waxay indhaheedu u arkayaan asaga wiil yar oo qurux badan, asaga indhihiisuna waxay ayada u arkayaan gabadh yar oo qurux badan, kedibna si hoose ayuu qalbiga uga leeyahay: "Waxaad ii tahay waxwalba oo qurux badan.!"

Ayadoo kasoo fogaaneysa ayey ayaduna qalbiga uga jawaabeysaa: "sidoo kale adiguna waxaad ii tahay waxwalba  oo qurux badan.!"

**HADDA WAXAAN KU LEEYAHAY WAXAAD IDHAHDAA: WAAN KU JECLAHAY WAANA BALLAN IN AAN KU MAQLAYO,  MEEL KASTA OO AAD JOOGTO  WEEDHAHA JACAYLKU WEY GAARAYAAN.!**

Weli waxaan ka murugoodaa qofka wanaagsan ee isku dhajinaya qof xun, iyaga oo heli kara qof wanaagsan, qof ku xumeeya ka guur, dib dambana ha u milicsan, waxaadse xasuusataa in aan ALLE ku hilmaam siinayn, ee maalin uun aad jid iskaga soo horbixi doontaan.!

Waxaad heli doontaa intaa kadib farxad ku ilawsiisa xanuunada qalbigaaga dhibaya.!

Waxaa yaraaday ahmiyaddii uu ku siin jiray.

Ogoow gabadh kale ayuu helay.

Aamusnaanta ayuu kuugu dadaalaa.

Ogoow wuu kaa tagi rabaa.

Xoogaa ma kadareentay inuu soo fiicnaanayo?

Gabadhii kale aya ka tagtay.

Haddii aanu kaaga warramin waxyaabaha noloshaada hormarin kara,

Meel dhigo dhalada catarku ka dhamaaday si aad madaxa kaga garaacdo markuu caadi kuugu soo laabto, isagoo kuu sheegaya in uu waxwalba hagaajinayo.!

## WAR GEELIINU BOQOL MA DHAAFEE! HADDII AAD SHEEGANAYSAAN IN IDINKA DHAN AAD MASAAKIIN IYO AXDI DHAWRAYAAL TIHIIN AAWAY KHAA'IMIINTII IYO SHAR BADANAYAASHII?

Maalin ayaad ii timid adiga oo liitay dhahayana: qalbigayga ayay jabiyeen.

Waxwalba oo aan gacanta ku hayay inta dhigay ayaan dhaymo iyo baxnaano kugu billaabay, Ilaa aad cagahaaga ku istaagay, intaa kadib waxaad samaysay waxwalba oo qalbigayga dhibi kara,  aniga oo dhoolacaddeynaya ayaan kaa tagay, waanan kaa fogaaday, maalintaas laga soo billaabo ilaa hadda waxaan iswaydiinayaa: muxuu yahay dambiga aan galay oo laygu ciqaabayo qof noocaaga ah in aan wax la wadaago.!

Khayaanadu qofna ma dhibto,  ee waxaa ina dhiba waa kalsoonidii aynu dareemaynay oo Meesha ka baxaysa,  xitaa kalsoonida nafteenna ayuu burbur baahsan ku imaanayaa,  waxyaabaha qaar waxaa jira haddii ay jabaan sidoo dii aan ku noqon,  waxyaabaha qaarna laguma daweyn karo cudur daar iyo shalaayto toona.

Shalaaytadaydiyey may intaa fahmaan inta aysan si kama dambays ah inoo dooran.

Go’aanka ugu xun uguna xanuunka badan waa go’aanka aynu qaadanno marka aynu ka tagayno qof aynu jecel nahay,  waa mar ay inoo muuqan waayayaan wax yool ah oo qofkeenna aynu kula joogno jacaylka halka dhinac ah mooyee.

**Hagaag! Haddaad iqiyaantay macnaheedu maaha in aad garaad badantahay, waxaa laga yaabaa in ALLE dambidhaaf iiga dhigayo, waxaa kale oo Meesha kujirta in mar dambe aanu qof adiga oo kale ah I qiyaami doonin.!**

Dadka usheeg in sida ay saadaalinayaan ee xun aysan waxba u dhici doonin! Marka ay ku dhahaan shay kale ayaa laguu abuuray ogoow in aysan waxaasi jirin oo mala awaal yihiin, ogoow suura galna maaha in aad muuqaal yar oo hal daqiiqo ah aad maantoo dhan daawato, kuma noolaan kartid muuqaalkaas, cumrigu waa ka gaaban yahay inta aad moodo waxwalba oo aad doonaysana gaarimaysid, kaliya waxaad dhahdaa:

Waxwalba oo aan ku dhaho masuuliyaddooda waan qaadanayaa.!

Waxwalba inaad ii caddeyso kuma qasbanid.

Waxaa laga yabaa in caqligaaga xanuunsani kuu waxyoodo in aad ixumaysay, suurayso in aad iraali galiso, in aad iraali galiso ayaa waxay ka qiimo badan tahay in aad cudur been ah sameysato. !

**QALBIGAYGOOW IN AY KU KHIYAAMEEN DARTEED CIDNA KUMA KALSOONID, QOFKASTA OO ISKU DAYA IN UU KUU SOO DHAWAADANA WAAD LA DAGAALAMAYSAA.!**

Badanka habeenkii saq dhaxe  ayaan toosaa aniga oo qolka mugdiga ah dhexdiisa jooga, labadayda indhood oo mid furan tahay midna laaban tahay, ayaan moobilkayga ka eegaa farriin ii sheegaysa in aad iisoo laabatay oo aadan markaan meelna iiga socon.!

Wax ka naxdin badan ma jiraan in riyooyinkaaga oo dhami gubtaan,

Adiga oo aan damin Karin dabka riyooyinkaaga qabsaday, markaad quusataynna iska dhiga in aanay waxba kugu dhicin,

Xanuun kaweyn ma jiro in qalbigaagu ooyin gocdo, laakiin kibirkaagu ku qasbo in uu qosol  gacan ku rimis ah dhoolaha la caddeeyo, isla xaaladdaas waxaad door bidaysaa in aad ooydo oo aad af labadii qayliso.!

**Marka aan rabo in aan kaa aargoosto kuma dhibayo ee kaliya jaceyl daran ayaan kugu abuurayaa markaad badda gunteeda tagtana waan kaaga siibanayaa oo waan kaa tagayaa, si aad ugasho cadaab waligaa aad ku jirto.!**

Quruxda iyo daganaanta iga muuqata, dhoolacaddeynta wajigayga ku astaysan, iyo waxwalba oo kuu warinaya in aan khayr ku suganahay, waa wax kama jiraan, ha isku dayin in aad iwaraysato haddii aan si kadis ah isku aragno, waayo; dumarku majecla in ay in badan hadlaan, sida qosolkeennuba ugaaban yahay, xanuunkeenna si xad dhaaf ah uma sharaxno, waxaas oo dhan waxaan usameynaynaa in aysan dadku ogaan dhibaatada gudaheenna ka dhex dhacaysa.!

Haddii uu nin gabadh si aad ah ugu qayliyo oo aysan ooyin wuxuu uqaadanayaa inay gabadh adag tahay, ooyintana aanba garaneyn, wuxuuna is dhahayaa buuqaagii ma saameyn, laakiin; irumayso habeenkii ayay qolka mugdiga ah ka dhex ooyeysaa, waxaas oo dhan waxay usamaynaysaa wax kale ma ahan, gabadha markii la uumay ayaa lagu lifaaqay kibirka iyo dhul iska dhawrka.

## Waxaan kuu qiranayaa in aan dareemayo in aan hunguubay markaan ku arkay adiga oo dhoolacaddeynaya, xaasidnimo igama ahan, ee waxaan filayay in  aadan farxi Karin la'aantay.!

Waligaa ma u hilowday wax aadan waligaa helin? Ama ma dareentay in aad baahi daran uqabto  wax aan waligaa kula rafiiqin , si khiyaali ah in aad waxaas ku hesho uun mooyee.!

Waxaan uxiisay gurigii aynu isku guursanay, waxaan uxiisay maalintii meherkeenna ee magacayga iyo magacaaga isku meel lagu qoray, waxaan u si daran ugu hiloobay gaarigaagii qadiimka ahaa ee usbuuc walba dhamaadkiisa aad igu qaadi jirtay, waxaan xasuustaa marka aan arko alaab dumar oo qaali ah  in aan ku soo eegi jiray adiguna xoolo buuran ma aadan lahayn oo waxwalba oo aan doono aad iigu iibiso,

Deetana; waxaan ku arki jiray adiga oo ka murugsan in aadan ii iibin Karin waxwalba oo aan doono, markaas ayaan dhagta kuugu sheegi jiray:

Dhibmaleh waxaa tahay ADDUUNKAYGA.!

Waxaan uxiisay laba kursi oo diyaarad aynu ugu safarnay magaalo aanu qofna inaga aqoon, waxaan u hiloobay gaarigii garoonka diyaaradaha innaga qaaday ee darawalka hadalka badan uu waday ee aynu hadalkiisa udhag raaricinaynay.!

Sababta aynaan darawalka hadalka ugu jiibinayn ma aysan ahayn in aynaan luuqaddiisa jajaban fahmeyn ee waa in labada kursi ee dambe aynu innagu sheeko jacayl iyo dhunkasho diirran ku haysannay.! Waxaan uhiloobay fasaxii aynu wada qaadanay innaga oo tagnay xeeb ashqaraar leh, deetana; roob shuux ah ayaa yimid si degdeg ah ayaan ugu cararnay geed weyn oo dheer oo Meesha ka dhawaa, si aan roobka uga okoranno.

Waxaan uxiisay cuntadii aan kuu Karin jiray eed markaad dhamaysataba aan mid kale kuugu tuuri jiray, deetana; waxaad igu amaani jirtay habka aan u bisleeyay,  waxaan uxiisay markii aad jikada iigu imaan jirtay aniga oo cunto kuu diyaarinaya, deetana; aad dhadhamin jirtay adigoo igu leh: waa dhag ee waxyar oo milix ah ku dar, waxaan uxiisay awlaaddii aynu isku dhalnay waxayna ahayeen laba wiil iyo gabadh, adiga ayay saa’id kuugu ekaayeen indhaha mooyee, indhahaaga kuwa ku qaab ah adduunka ma dul saarna,  aad ayay u qurux badan yihiin, laakiin; waxaan ku nacay maalin uunbay dhex fadhiisanaysaa gabadh ila mid ahi.!

# DHAMBAALADII UGU DAMBEEYAY EE GABADHII MAGACEEDU KU DHAMAANAYEY XARAFKA (ة).

SAAXIIBADA QAYB KA MID AH WAA NICMAD, QAYBTA SOO HARTAYNA DAMBI DHAAF UUNBUU ALLE KAAGA DHIGAA.!

**Kitaabka jacaylka kumannaan qarni ka hor ayuu qof ku qoray sidaan wuuna dhintay: "xeerarka jacaylka kama mid ahan kala tagga."**

# 1

# HAAJARA!

TALAADO.

2:47 AM.

Markii aan dhameeyay dhambaaladayda.

Markii aan qoraalkii dhameeyay dhambaalkii waxaan galiyay sariirtayda hoosteeda, hurdo wacan ayaan isku diyaariyay, daahyada daqadda ayaan simay, nalka ayaan damiyay, kadibna; buste weyn ayaan isa saaray hudro wanaagsan ayaan isku diyaariyay, inta aanan galin hurdo dheer waxaan jeclaan lahaa qof igu dhaha: nabad ku seexo nabadna ku soo toos.!

Intaanan gam'in waxyar ayaan fikiray, haddii aad haysato qof ku dhaha habeen wanaagsan nabad ku seexo nabadna kusoo toos waxaa tahay qof nasiib badan, haddii aad haysato qof saacado dheer u dhag raaricin kara hadalkaaga bilaa murtida ah oo aan kugu daaleyn waxaa tahay qof nasiib badan, haddii aad haysato qof aad waqti walba wici karto adiga oo aan ka fekerin mashquul miyaa mase ma ahan waxaa tahay qof nasiib badan, waxyaabahan yaryarka ah qofna kuma baraarugsana muhiimadda ay leeyihiin, qof walba wuxuu muhiimaddooda ku baraarugaa marka uu waayo, waana xaalad adag run ahaantii markaas.!

Labada indhood ayaan isku laabay kadibna hurdo dheer ayaan duc dhahay.!

****

TALAADO.

10:3O AM.

SADDEX JEER AYAA LA ISOO WACAY.!

Barqo heraad ayaan soo toosay, waxaan moobilkayga ku arkay seddex wicitaan iyo fariin digniin ah oo sidaan u qoran: “haddii aanad bixin lacagta ku qoran warqadda qaansheegta, wax khadamaad ah naguma lihid.”

Qofkaan iska dhigaya in uu ii hanjabayo waa qof qalbigayga aad ugu dhow, waana HAAJARA, waxaan is baranay sanadkaygii koobaad ee jaamacadda BOQOR CABDI CASIIS, mar dambe ayaan si wanaagsan isku barannay waxa ayna noqotay saaxiibad wanaagsan, waa waxa kaliya ee aan jaamacadda ka faa’iiday waa in aan gabadhaas bartay..

Nasiib darradeydee muu iisoo noqdo waqtigii aynaan is aqoon,

Waqtigaas waxaan ahaa gabadh aan jacaylka waxba ka aqoon, waxaan ahaa gabadh farxad badan, wax murug iyo warwar ah tunka kuma sidan, qofna kama fekeri jirin, waxaan iska seexan jiray markay hurdo iqabato.

Markaan  kaco moobilkayga kuma baraan bari jirin aniga oo fariin  ka eegaya,  ama cid isoo wacday,  mana ahayn sida dadka moobilkooda daroogada uu ku noqday ee jaceylka aawgii daqiiqad walba fiirinaya.!

****

Aan dib idinkugu celiyo is barashadeennii gabadhii haajira ahayd, waxaan dib idinkugu celinayaa sideed sano ka hor jaamacaddii **boqor cabdi caiis** maalin inaloo jeedinayay muxaadaro kimistiri ku saabsan.!

Aniga oo muxaadarada dhagaysanaya ayaa gabadh inta gadaal iga gujisay idhahday:  kursiga kugu xiga mala fadhiyaa?

Dabeecad ahaan ma jecli qof aynaan is aqoon in aan la hadlo, xitaa haddii uu iwaydiiyo su'aal caadi ah.!

 Anigoo afka kala furin ayaan madaxa u ruxay anigoo u ishaaraya in kursigu banaan yahay,

Waxay tiri: mahadsanid, weyna soo is taagtay iyada oo boorsadeeda madaxa iga marisay iina muujinaysa inay si tilmaam ah ii raali galinayso, anigu waxaan si quman udhagaysanayay mucalimadda muxaadarada inoo jeedinaysa, sababtoo ah macalimaddu aad ayay u hadal badan tahay, hadda waxa ay sheegayso waxba lagama fahmo.!

Waxyar kadib ayaan eegay gabadhii igu cusbayd, kadibna; waxaay itiri:

Ma kula hadli karaa?

Maba fiirin anigu xaggeeda laba sababood dartood: waa mare ma jecli in aan la hadlo dadka aanan aqoon, marka labaadna ma doonayo in la iga saaro hoolka muxaadarada, macalimadda muxaadarada jeedinaysa gabdhaha hadla banaanka ayay usaartaa, waxaad moodaa in macalimaddu yaraanteedii ku hamin jirtay in ay noqoto tababare, ciyaar yahannada goraanka uga saara xitaa khalad yar, qofkii hadladaba macallimaddu banaanka ayay udiraysaa.!

Mar kale ayay dhahday: ma kula hadli karaa? Lama hadal waxaanan isku dayay in aan macalimadda uun la socdo, gabadhii waxay tiri: ma dhaga la'dahay saw kula hadli maayo?

Madaxa ayaan uruxay aniga oo leh maxaad rabtaa?

Inta gacanta iisoo taagtay ayay tiri: magacaygu waa haajara adna?

Anigoon gacanta u taagin ayaan ku iri: ma waalan tahay meeshaan ma meel la isku bartaa?

Gabadhii haajira gacanteedii ayay laabatay iyadoo leh:  meeshaan nafis kuma dareemayo in aan kula hadlo ayaan rabay.

Aniga oo yaaban ayaan iri: halkaan ma meel lagu wada hadlaa?

Markiiba macalimaddii ayaa qaylisay waxayna tiri: sheekadiinna banaanka ku dhameysta.

Macalimaddaas qofka ay bixiso intaa uma dhaafto buunto ayay ka goosataa, aniguna ma rabin in aan imtixaanka dhaco, aniga oo ciil la tiicaya ayaan banaanka ubaxay, ilmo ayaa igasoo dareeri  gaartay, banaanka ayaan is iri xitaa ku sii ooy, markii aan banaanka  ubaxnay gabadhii kulahaa:

Baahi ayaa ihaysa, maqaayad fiican meelahaan maku taallaa oo aynu wax kaga soo dhufanno?

Aniga oo rumeysan la’ hadalka ay gabadhu leedahay ayaan iri:

Sababtaada ayaa xiisadda laygaga soo saaray adna si fudud baad maqaaxi iyo wax baas uraadinaysaa, madaxa ayay ruxday mana aysan ii jawaabin iyada oo aragtay in aan xanaaqay.!

Laakiin waxay tiri: lacagta cuntada anigaa bixinaya ee meel ina gee.!

Inta is heyn waayay ayaan iri: waligay xiisad laygama eryin, maantayna sababtaada ayaan bananka ku joogaa adna waxaad udhaqmaysaa sidii in aadan waxba igu sameyn, markaas kor ayaan uqaylinayay waxaa hadalkayga maqahay macalimaddii ka kanayd, inta banaanka usoo baxday iyada oo xanaaqsan oo ookiyaalihiina gacanta kusidata ayay tiri:

Xitaa haddii aan bananka idin soo bixiyay wali ma buuq bad waddaan?

Mcalimaddii maadaama ay aragtay aniga oo qaylinaya markii ay banaanka soo fiirisay, anigii ayay iciqaabtay, waxayna iska cafisay haajira oo sabab u ahayd dhibkaan aan dhexda ka taaganahay, waxayna macalimaddii sheegtay in aan anigu banaanka iska joogi doono maadaamaaan dambiile agteeda ka ahay.

Haajira: anigu soo xaroon mooyo saaxibadday ayaanan la joogayaa.

Macalimaddii dhiigga ayaa boqol tagay, caro awgeed wajiga ayaa is baddalay laakiin; si ay karaamadeeda u ilaashato  iyada oo is dajinaysa ayay aniga igu tiri adigu soo gal haajira wey kibirtaye.!

Anigu waan laba labeynayay,  in aan fasalka galo waan rabay laakiin; in aan gabadhaan cidleeyo ma rabin, xitaa iyada oo sabab u ahayd in fasalka layga soo eryo,  sababta oo ah iyaduba waa ay diiday in fasalka ay gasho aniga darteey iyada oo og in maadadaas ay imtixaanka ku dhici doonto,  codkayga inta sare uqaaday ayaan macalimaddii ku iri: soogali maayo.

Haajira inta hoos iila hadashay ayay tiri: iska gal waa cadiye.

Mararka qaar waxa aynu ubaahannahay waxwalba oo aynu qabanayno in nalagu dhiiri galiyo, dhankii fasalka ayaan u luuday, talaabo walba oo aan uqaado dhanka fasalka waxaan niyadda ka lahaa mar kale ayaad ka qoomameyn doontaa haddii aad gabadhaan meeshaas uga tago, inta istaagay oo gadaal usoo milicsaday ayaan ku iri: magacaagi waa haajira ayaan filaya?

Haajira: Haa!

Cuntana waad u baahantahay saw maaha?

Haajira: haa!

Waxaan eegay dhankii macalimadda waxaanan mar labaad dhahay soo gali maayo.!

Wixii maalintaa ka dambeeyay saaxiibo ayaan noqonay waliba isku dhaw oo ceeshaw milix ah, laakiin; maadadii maalintaas nalaga ceyriyey ee kimistariga wixii imtixaankeeda inagu dhacay waad fahantay ayan filayaa? Lagama sheekeyn karo.!

**MUSHKILADDA GABADHA OO DHAN WAA IN AYSAN HELAYN CID U DHEGRAARICISA, HADDII AY GABDHU HESHO CID U DHEG RAARICISA WAY XALIS MAYAAN DHAMMAAN MASHAAKILKEEDU.!**

# 2

# WAA FURSAD IN AAN SHEEDDA KAA ARKI KARO.!

ARBACO.

9:59 PM.

CODKA MOOBILKA.

Moobilkayga ayaa soo dhacay waan ku orday oo aan eegay lambarka isoo wacaya saaxibadday HAAJIRA markaan sidaa uga qabtayba waxay tiri:

Seddex jeer ayaan xalay ku soo wacay maad moobilka iga qabatid?

Waxaan iri: saaxiib waan hurdayey xiliga aad isoowacaysay kadibna waan hilmaamay.

Haajara: ALLE ayaan kugu dhaariyay miyaad ijartay, oo wax dhib ah miyaa dhacay?

Haajira waa qofka kaliya ee codkayga ka garta in ay wax iga qaldan yihiin dhaqtar nafsi ah oo la iisameeyay ayaad moodaa, waa qofka kaliya ee aanan sirba ka qarsan,

waxayna ogtahay qisadeyda adiga kugu saabsan ( jacaylkayga) waxayna ahayd garabkayga waqtiyo badan oo aan adiga kuu baahnaa, waxaan ku iri: xalay waxaa dhacay intaan maktabadda ku sugnaa wax aad la yaabto.

Haajira: maxaa dhacay?

Waxyaabaha qaar waxaa macaanka ka qaada in aynu isku sheeegno innaga oo kala maqan oo moobil ku hadlayna mana qumana, sidaa darteed waxaan go'aansaday in aan la kulmo waxwalbana lawadaago.!

Waxaan ku iri: saaxiibtay haajiraay markaan is aragno ayaan waxwalba kuu sheegayaa, aniga oo ka cabsi qaba inay si sandulle ah wax iiga soo saarto ayaan iri:

Maxaad habeenkii dhawayd iga rabtay ee aad seddexda jeer isoo wacday.?

Haajira: berri waa bandhigga buugaagta, adna waxaad tahay qof wax aqriska jecel, waxaan ku fekeray in aad ku farxi doonto haddii aad na raacdo ee kawarran?

Markaan hadalkaas maqlay aad ayaan u qoslay, sababtoo ah waan ku haminayay in aan arko haajira oo gacanta buug ku wadata, maantayna iyadaaba aniga ii wadda bandhigga buugaata.!

Maxaad ka doonaysaa bandhigga buugaagta?

Haajira: anigu ma doonayo in aan aado ee Asiil ayaa rabta inaan wado.

Waxaan ku iri: ilaa goorma ayay Asiil buugaagta danaynaysaa?

Haajira:

Saaxiib laf cad ayaad toobin ku haysaa, Asiil buugaag ma gadan rabto mana doonayso inay bandhigga riwaayado ka raadsato, dadka isku buuqsan ayaa riwaayadaha aqriya, waxay rabtaa in ay soo gadato buugaagta jaamacadda oo laga helo madbacad ku taal Meesha buugta lagu soo bandhigayo oo aan meelkale laga heleyn.!

Imisa jeer ayaan haajiraay kugu dhahay: dadka wax aqriya iskuma buuqsana.!

Haajara: waan kula kaftamayay.! Waxaas dhib maleh ee berri mana raacaaysaa? In aad haye dhahdo ayaan rajeynayaa.!

Waan ka fekerayaa meeqo saac ayaan baxaynaa?

Haajara: shan saac oo subaxnimo( 11:00  am)

****

Gadaashayda ayaan eegay markii aan la hadlay haajara, waxaan arkay sawirka buuggaaga dusha kaga dhagan oo si daran iisoo eegaya, waxaabad imoodaa in uu illeeyhay: haajara haa waa in raacayaa ku dheh, buuggaaga boorsada  garabka ayaan galiyay markii aan dhameeyay ma garanayo mar aan banaanka usoo saaray.

Markiiba waxaan wacay haajara waxaana ku dhahay: waan is raacaynaa.

Haajara: waa maxay xamaasaddaan oo dhan.

Xamaasaddas ma aqoon mar ay igashay waxa aan damcay in aan been usheego, markaba inay fahmayso ayaan gartay, kadibna; waxaan dhahay waxwalba markaan kuu imaado ayaan kuu qaadaa dhigayaa.!

Qoraaga buugga jaldiga madooboow ma hubo in aan berri bandhigga buugaagta isku arki doonno iyo inkale?

Bandhigaas waan kaa raadin doona waayo; waa Meesha kaliya ee aan filayo in aan kaa heli karo.

Dhambaaladayda dib ayaan qoraalkooda wax uga baddalayaa,  xaalad walba oo aan buuggaaga arko aniguna waxbaan qorayaa,  markii ay haajira iisheegtay in aynu tagayno bandhigga buugaagta waxaan isku aadistay dhambaaladayda,  haddii aan dhambaaladaan kuu dhiibo waxaan rabaa in aad iska jeex jeexdo ama aad gubto marka aad ka faaruqdo aqrin tooda.!

Waxaan soo qaatay warqado kale oo cusub, cabaar ayaan fekeray waxaanan ku qoray:

"Sida caadada ah markaan mid kamid maktabadaha magaalada dhex joogo wax aan adiga ahayn kama fekero,  waxaan raadiyaa buug iga dugsada kalinimada iyo daltabyadaan ihaysa,

Waddanka kama tagin  ee waddankaygii ayaa iga tagay,  jaceylkayga kaliya ma tihid,  ee waxaa tahay waddan ku darsan waddankayga oo ku midaysan wadnaha iyo beerka.

Waxaad xasuusataa inta aynaan kala tagin ma ahayn mid jecel wax aqriska,  laakiin; kadibkaa waxaan noqday mid wax aqriska jacel, shayga kaliya ee ikaa xasuusiya waa wax aqriska,  Meesha kaliya ee aan ku kulanno waa wax aqriska,  waxa kaliya ee waqti tagay  iisoo celin karana waa wax aqriska.!

**BANI AADAMKU WAA MAKHLUUQ AAN JIRIN ILAA UU WAX JECLAADO, MARKAAS AYUU HALEELAYAA XAQIIQDA.**

# 3

# WAAN KUU IMAANAYAA EE HALKAA DARTAYDA U JOOG!

KHAMIIS.

4: 55 PM.

WADDADA BANDHIGGA BUUGAAGTA.

Alle ayaan kugu dhaariyee wa maxay waxaan oo waraaqo ah? Ayay hajara iwaydiisay  innaga oo wada fadhinna kuraasta dambe ee gaadhiga, ugama warramin waxwalba oo maktabadda ka dhacay,

Sidaa darteed  way la yaabtay warqadahaan tirada badan ee aan wato.!

Gaadhiga dhexdiisa ayaan wax walba ugu sheegi lahaa haddii aysan walaasheed la socon lahayn, sidaa darteed ayaan dhagta ugu sheegay in aan waxwalba usheegayo marka aynu bandhigga tagno.

Asiil iyo haajara waxay iisheegeen in qoyskoodu uu halkaan imaanayo, bandhiga kadibna ay casho aadayaan anna aan raaco waaan ku waafaqay.!

****

Qalbigaygu wuu jugleynayaa sidii faras dagaal ku jira,  waxaan  garan la' ahay haddaan ku arko sideen waraaqaha kuugu dhiibaa?

 Waxa kaliya ee aan yaqiinsanahay waa in aanan kuu soo dhowaan Karin,

 Sababtoo ah indhahagu waa bad, badduna wey khiyaano badan tahay, mana garanayo dabaasha, xitaa ma haysto  qalabka  dabaasha,  wax kale oo i badbaadin kara majiraan haddii aan  ku arko.!

****

Markii aynu gaarnay bandhiggii buugaagta, haajara walaasheed Asiil waxay raadsatay buugaagtii jaamacadda ee ay soo doonatay,deetana; waxaa gacanta isoo qabatay haajara waxayna si qasab ah ii fadhiisisay kursi waxaad moodaa dambi-baare cabqari ah oo kiis weyn gacanta ku haya sida ay indhaha indhaha iigu hayso.

Miis yar oo inoo dhaxeeyay ayay gacanta ku dhufatay.

Haajara: ALLE ayaan kugu dhaariyee maxaa sidaan oo dhan ugu naxsan tahay?

Waxaan iri: waa isaga magacaaga ayaan usheegay waanan ooyay.!

Haajara waxay u fadhiisatay qaab siman si ay arrinta si dhab ah ugu wahajdo.

Haajara: muxuu yahay, waxaa lagaa rabaa in aadan xasuusan.

Buuggaaga ayaan boorsadii ka soo bixiyay kadibna wajigaaga ayaan farta ku fiiqay, waxaanan iri: fiiri waa kanaa, waxwalbana waan uga warramay, waxaan iri: warqad ayuu iisoo diray uu ku sheegayo in uu wali ijecelyahay, wuxuuna ka cudur daartay in aan isa seegno kala tagguna jidkeenna noqdo.

Waxaad ahayd dadka neceb qoraayada sawirkooda buugaagta ku dhajiya iyagoo kaliya raba in ay caan noqdaan, haddana adigu sawirkaaga ayaad buuggaaga ku dhajisay si ay iigu sahlanaato in aan kusoo baadi doono.

Warqadaha aan wado waa dhambaalo isaga aan uqoray, inuu aqriyo ayaan rabaa, waa intaas waxa xamaasadda igu beeray,

Haajara: dhambaalada wax walba miyad ku sheegtay markaad kala tagteen ka dib?

Maya, ee is daji waxaa qurxoon in aanan waxwalba sheegin.!

Haajara: keen dhambaalada.!

Waxaan kabaqay in ay jeex jeexo ama ay gubto, waxaan ku iri:

Maxaad ku sameyn?

Haajara: waan aqrinayaa uun.

Haajara waxay iga qaadatay warqadihii waxay guda gashay in ay aqriso iyada oo uu ka muuqdo isku dhex yaac fara badan,   waxay aqrinaysay ku dhawaad hal saac weyna dhamaysay,   warqadihii ayay miiska saartay, weyna amustay.!!!

****

Xaalaaddaas daciifnimo ayaan dareemayay,  xabad quraanjo ah waan ka liitay oo ciriiri dareemaysa ALLANA ka baryaysa in qof ku istaago si ay nolosha cadaabka ah uga baxdo.!

Sidaas si kadaran ayaan dareemi lahaa haddii saaxiibtay haajara warqadahayga jeex jeexi lahayd,  waxayna ifartay in aan guriga ku laabanno,  amarkeeda ayan qaatay anigoon waxyar ku diidin,  hadalkii ayay haajira joojisay warqadihii ayay eegaysay cabaar, waqti badan ayay aamusnayd.

Haajara: wax miyaad idhihi rabtaa?

Anigoo cabsi qaba ayaan eegay waanan iska aamusay,  haajarana waa ay iska aamustay,   laakiin waxay umuuqatay in ay wax ka fekerayso

Markii aamuskeedii dheeraaday ayaan ku iri:

Waan ogahay in aan waqti dheer galiyay in aan hilmaamo,  deetana; waxaan warqadihii ka haabtay miiska dushiisa, aniga oo aaminsan in aan ku qaldanaa in aan qoro waqti dheerna galiyo,  sababtoo ah warqadahaani waxay iga dhigaan  daciif,  waan jeex jeexi doonaa markaan guriga tagno, mar dambana waxaan oo kale  waqti iska galin maayo.

Haajara: maya sidaa ha dhihin, waxaas macquul maaha waana siinaynaa dhambaalada asaga,  waxaan uqaatay in ay igu jees jeesayso ama ay imtixaan iga qaadeyso jacaylka aan sheegayo in uu runyahay iyo inuu afka baarkiisa yahay?

Sidaa darteed waxaan gawsaha iskugu geeyay hadalkaygii hore, waxaanan iri:

Maya maya waa garaad xumo in aan dhambaaladan wax wanaagsan uqaadanno, ee waan jeex jeexayaa haddaan guriga tago.!

Iyadoo dhabnimo uhadlaysa ayay haajara tiri: isaga hadda waa qoraa, ka codso in uu dhambaaladaada faafiyo, waxaa laga yaaba inay anfacdo ninwalba oo gabadh jeclaada, adiga hakuu noqoto wax soo saar ku anfaca anigana I anfaca.

Waxaan iri: laakiin; wax aan qoray uma qalmaan in dadka la hor keeno, waxaa hadalkii iga jartya haajara: isaga ayaa qoraa ah wuuna qurxinayaa, mana haysano waqti aynu ku doodno, waxba haka cabsan isaga ayaa magaciisa ku faafinaya in aad adigu qortayna cidna kama shakinayso, qofna ogaan maayo in aad adigu waxaan qortay qaraabo iyo ehelba.!

Ma ganayn waxa saaxiibaday haajara sheegayso ma runbaa mise? Aragtideydu ma mid wax ku ool ah baa mise waa aragti ma dhalays ah oo uun sii kordhinaysa xanuunkayga iyo murugtayda?.!

Laakiin; sidaan horay usheegayba waqtigaas daciif ayaan ahaa wax aan qabtana ma garaneyn.!!

Anigoo xaqiiqsaday in ay haajara run sheegayso ayaan iri: si aan udhamaystiro waxaan ubaahanahay warqado kale iyo qalin.!

Haajara way iga ag tagtay waxayna iisoo noqotay iyada oo wadda waraaqo fara badan iyo qalin.!

Qalinkii iyo waraaqihii ayaan is dul dhigay waxaan ka fekeray waxaaan qori lahaa, wax badan ayaan fekerayay wax macno leh oo aan qorana waan waayay.!

Aniga: Ma woodo in aan wax qoro?

\Haajara: sabab?

Isagii ayaa I hortaagan in aan wax si fiican u qorana ma karayo.

Haajara waxay u hinqatay inay ku soo raadiso maadama aynu bandhigga kaa fileynay, waxayna tiri: meelkasta oo uu joogo anigaa keenaya ee maskaxdaada daji qoraalkana gaban gabee.!

Haajara: si fiican ayaan usoo raadinayaa ee nus saac ma kugu filantahay?

Aniga: Ma garanayo balse waxaan rajeynayaa inay igu filnaato.!

Inta aysan haajara bixin ayaan usheegay in aysan aad isku daalin waayo waxaa dhici kartaba in aadan iman bandhigga buugaagtaba.!

Kawarran haddii aad soo weyso?

Haajara: dhibmaleh madbacaddii buuggiisa daabacday ayaan ka doonayaa, haddaan halkaas ka waayana qoraayada kale ee asxaabtiisa ah ayaan ugu dhiibaynaa, ilamana ahan in ay diidi karaan.!

Cabaar ka bacdi ayay haajara igu soo laabatay iyada oo kusoo weysay waxayna tiri: ma taqaanaa madbacadda buuggiisa daabacday?

Madaxa ayaan ugu tilmaamay in aanan aqoon, haajara ma ahan dadka si sahal ah isku dhiiba, buuggaagii ayay boorsadayda ka bixisay iyadoo kolba dhinac ka fiirinaysa, waxaad moodaa baare loo tababaray shaqadaan.

Haajara: waa laga maarmaan inaan buuggiisa ka helno madbacadda daabacday, [iyada oo dhoola caddaynasa]

Haajara: alxamdullaahi waan helay waxaana buugggaan daabacday madbacadda suugaanta carbeed, Meesha ay madbacaddaasi ku taalo ayaan ka soo raadinayaa.!

# 4

# DHOOLACADDEE ADDUUNKA AYAA DHOOLACADDEYNTAADA UBAAHAN.!

Qalinka ayaan qabsaday kadibna warqadda waxaan ku qoray intii haajara kugu maqnayd:

Qoraayaw waan ogahay waxwalba oo aan kuu soo qoray uma qalmaan in la aqriyo lana dhugto, waanan ogahay dhambaalada aan ku falaaday in la daabaco uma qalmaan, balse haddii aad wali si dhab ah ii jeceshahay waxaan kaa codsanayaa in aad warqadahaan daabacdo deetana; aad faafiso, laakiin; hal shardi magacayga haku qorin, in aan qoray in la ogaado ma doonayo.!

Yeelkadeede adduunku wuu ogaanayaa in gabadhu marka ay wax jeclaato ee ay masayrayso taas macnaheedu aysan ahaynin ay qof xun tahay ee waa in ay doonayso in ay kasha iyo laabta ku haysato qofka ay jeceshahay, gabadhu haddii ay nin jeclaato kana codsato in uu guursado macnaheedu maaha in ay gabdhu xuntahay, hooyadii mu'miniinta ee khadiijaba nabiga N.N.K.H. iyada ayaa jeclaatay, waxayna ka dalbatay in uu guursado, waqtigaasna nabiga N.N.K.H. adduunka looma soo dirin, khadiijo in ay nabiga doonatay qof xun haddii aysan ku noqonayn gabadha maantay nin u qalma guur waydiisatana qof xun ma ahan.!

Ma ogtahay in markii aynu wada joognay aad aan kuu jeclaa,

waxaan kabaqi jirnay in aan ALLE dambi weyn ka galo dambigaasna uu sababo in aan is wayno, maantayna wali waan ku jeclahay balse maantay waxaan shalay uga gadisanahay maantay waxaan ka baqayaa in aan ALLE dambi weyn ka galo kadibna ALLE igu ciqaabo in aan ku arko.!

Wax kale ma jiraan ee waxaan ka fekaraa sida aan noqonayo marka aan ku arko, ma garaadkayga ayaan raacaa oo waan kaa fogaadaa? Mise qalbigayga ayaan dhagaystaa oo aniga oo rucleynaya ayaan kuu imaadaa.!

Qoraa han weyn noqo waxaan kugu sagootinayaa in waxwalba oo aad qorto aan aqrin doono, sabar iyo dulqaad aan ku sugo malihi buugaagtaada soo socota.!

Qofna yaanu kaa caraysiin is daji, markasto dhoolacaddee, waayo; dhoolacaddeyntaada waxaa ubaahan caalamka, noloshaada kuma farxaysid haddii aadan dhoolacaddeyn, waxaan rajaynayaa in ALLE ku siiyo weedho iyo sarbeebo laga yaabo marka aad qoraaladaada ku darto in aad loosie jeclaado, waxaan kuu rajaynayaa in aad qorto riwaayado adduunka oo dhan uu la dhaco, waxaan ALLE marwalba kaaga baryayaa in uu ku siiyo aqristayaal fara badan oo ku jecel, inta aan kaa maqanahayna ku ilaaliya.

****

Maalin uubaan kulmeynaa sheeko xariirna maaha, haddii aan adduunka ku kulmi weyno waxaan ku kulmi donna aakhira,  markaan is aragno waxaan kuu sheegi doonaa in aanan daqiiqad ku hilmaamin,

daqiiqadna aanu jaceylkaagu maankayga ka bixin,  markasta iyo waligeedba waxaad ii tahay waxwalba oo qurux badan: WAXAA TAHAY ADDUUNKAYGA.

# 5

# UGU DAMBEYNTII WAAN DHAMEEYAY.!

Khamiis.

7:09 pm.

GABADHII YAREYD.

Hal saac iyo shan daqiiqo kadib ayay haajara soo laabatay,

Haajara:

waan soo helay wuxuu ku mashquul san yahay saxiixa buuggiisa, ee ma dhameysay qoraalkii?

Haa: ugu dambeyntii waan dhameeyay.

Haajara warqadihii ugu dambeeyay ee aan qoray ayay iga qaadday wayna aqrisay.

Haajara: waa cajiib run ahaantii, haddii uu ku jecel yahay wuu daabici doonaa waana uu faafin doonaa.!

Marka  qof aynu jecel nahay aynu kala irdhawno ma awoodno in aan hortiisa is taagno, inaan isaga dhan ka dal doorsanno mooyee,  aniguna kama dal doorsan,  sidaa  darteed ma karayo in aan hor istaago,  mana awoodo in aan waraaqahan udhiibo.

Haajara:  masahlana  in aad wada kulantaan, aynu qaab kale u fekerno, kawarran haddaan anigu ugeeyo kana soo tago si degdeg ah waliba.

Waxaan ku iri: maya waxaa dhici karta in aad qalad yar gasho wax walbana ay inaga fashilmaan.!

Si kadis ah ayaan haajara u waydiiyay goorma ayay ehelkaagu imaanayaan?

Saacadda gacanta ayay eegtay waxayna triri haajara: toban daqiiqo kadib wey imaanayan.

Haajara: maxaa soo waddaa?

Waxaan ugu jawaabay  dhoolacaddeyn dhagar ku dheehan tahay.!

****

Gabadh yar oo ehelkaaga ka mid ah ayaan waraaqaha ugu dhiibaynaa waxaanan faraynaa in aysan waxba usheegin hadduu indhaha dhiig ka keeno,  waxaan kaloo gabadha yar si gaar ah ufaraynaa in aysan usheegin iyadu cidda ay tahay iyo Meesha ay deggan yihiinba.!

****

Gabadhii yarayd inta aysan tegin ayaan u tegay,  waxaanan iska dhigayay inaan jaakatiinka utoosinayo,  laakiin ; sida xaqiiqda ah waxaan rabay inaan jeebadda ugaliyo toban riyaal,  deetana; dhegta ayaan ugu  sheegay aniga oo haajara hadalkayga  ka qarinaya:  lacagtaan waa inaad siisaa haka ilaawin, gabdhii yareyd madaxa ayay ruxday sidii in aan sir weyn usheegay oo aan qofna loo sheegeyn,  waxayna tiri:

“Ma illaawi doono”.

Markii ay sidaa ugu dhaqaaqday halkii uu ku sugnaa, ayaan ka daba dhawaaqay: magacaaga ha usheegin, yuusanna kula sheekaysan si aanu sir kaaga ogaan,  markaad inoo soo laabanayso  iska hubi in uu ku daba socdo iyo   inkale,  deetana aniga oo tijaabinaya ayaan ku iri:  maxaad ku dhahaysaa marka uu ku waydiiyo yaa waraaqahan kuu soo dhiibay?

Haajara oo qaylinaysa ayaa hadalka innaga soo dhex gashay waxayna tiri:

Waxaad dhahaysaa waraaqahan waxaa iidhiibtay gabadh, marka uu ku waydiiyo cidda ay tahay, waxba ha usheegin,  markuu ku waydiiyo xaggee aaday gabadhiii waraaqahan kuu dhiibtay?  Wey baxday dheh mana garanayo, hana usheegin Meesha ay aaday iyo wax un tilmaam noqon kara,  sidaas ayaan gabadha yar waraaqaha ugu soo dhiibnay, aniga iyo haajarana meel fog ayaanu ka eegaynay oon arrinteeda kala soconay.!

****

Lacagtaas waxaan kuugu qoray weedho kugu saabsan,  mana rabin  in ay haajara aragto waqtigaas,  haddii ay ogaan lahayd  haajara waxa  aan lacagtaas ku qoray wey yaabi lahayd, mana aysan ogaan waxa aan kuusoo qoray haddii ay ogaan lahayd wey murgi lahayd,  laakiin: anigu in aan lacagtaas arrimo badan oo jaceylkeenna quseeya aan ku qoro sax ayaan u arkayay waxaana la joogaa waqtii aad waxwalba fahmi lahayd.!

****

# CUTUBKA: **3**
# QORAAGA.

**WAXAY AHAYD XUURAL CEYN SAMADA KA TIMID, ISAGUNA WUXUU AHAA NIN KU NOOL DHUL WADA FOOLKAANO AH.!**

**Waxay tiri: sidee gabaygu kuugu soo degaa?**

**Wuxuu yiri:  ma garanayo laakiin; waxaan eegaa indhahaaga, deetana waan gabyaa.!**

**Iyada oo xishoonaysa ayay tiri: sidaada oo kale suugaanta ma tirin karaa?**

**Waxay tiri:  gabaygu gabay ma qoro.**

# 1

# XAQIIQDA.!

JUMCE.

9:00 AM.

ANIGOO XANUUN DHEXDA UGA JIRA.

HUTEELKA.

TOBANKII RIYAAL.

Markii aan dhameeyay warqadihii ay gabadhu iisoo dhiibtay,

Markiiba moobilka ayaan soo qabsaday waxaanan wacay maamulihii madbacadda laakiin; moobilkiisu wuu xirnaa, waqtiga ayaan eegay mise waa laba saac waxaan xasuustay in uu hurdo, ciil badanaa muu saakay xili hore iska tooso.!

Hadda ayaan fahmay sababta gabadha yari ay lacagta ii siinaysay, waxaan kale oo fahmay sababta gabadha lacagta la iigu dhiibayay,

Si kastaba ha ahaato'e waa in aan helo lacagtaas si aan u fahmo waxa ay gabadhii qarsoonayd iigu soo qortay.!

****

Waxaan markiiba soo aaday bandhiggii buugaagta, isagoo hal saac furan ayaan imid, markii aan madbacaddii buugayga daabacday usoo dhawahay waxaan arkay maamulihii maktabadda oo meel fadhiya gabadh qoraayad ah ayuu la sheekaysanayaa si dabacsan ayuu ula muusoonayaa, wuxuuna ahmiyad badan siinayaa hadal kasta oo ay dhahdo, badanka raggu marka ay gabadh quruxan arkaan waxay isku baddalaan bisad oo kale, laakiin; maamulaha madbacaddu wuxuu isku baddalaa bisad guri joog ah oo aad loo rabaayadeeyay, wuxuuna raba in uu gabadhaas ku qanciyo in ay la gasho hishiis madbacadeed, heshiis kaas oo ah kii aan anigu ka qoomameynayay oo kale, xaqiiqada heshiiska iyo dhuuxiisuba waxay u laabanayaan isaga iyadana laf cad ayuu u tuurayaa.!

Ma sugin in ay wada hadalka dhamaystaan ee waan ka jiiray, dhanka gabadha ayaan ka soo maray si uusan bandhiggaba iiga eryin, isaga oo gabadhaas quruxda badan hortaagan waxwalba ima dhihi karo waxwalbana iguma sameyn karo,

Inta udhaawaday ayaan maamulihii dhagta ugu sheegay:

Aaway tobankii riyaal ee ay gabadhii yarayd kuu dhiibtay?

Wajigiisa oo dhan ayaa is baddalay laakiin; waxa uu isku dayay in uu dhoola caddeynta gacan ku sameyska ah ee uu gabadha u muujinayo uusan qasaarin.!

Maamulihii: ma intaas oo qura ayaad sheekada nooga qaseysay?

Shalayna waad iska tagtay, tan kale maxaad wicitaanadayda oga soo jawaabi waysay?

Waxaan diyaar saday cudur daar macquul ah, haddana; waxaan xasuustay in maamulahaani aanu waxba ilaawin waxna saamixin.!

Haddana; waa lagama maarmaan in aan wax uun dhaho: shalay aniga oo ku sugan bandhigga markii aan ku lahaa waan kuu imaan hawo ayaan qaadanayaa ayuu moobilkaygu iisoo dhacay waxaa la iisheegay in isbitalka la geeyay qof ehelkayga ka mid ah, markiiba aniga oo dagdagsan ayaan gaari ingeer ah qaatay, isbitaalkii ayaanan ugu tagay waan jeclaa in aan waqti hore ka soo tago laakiin; dhiig ayay ubaahdeen, sidaa darteed aniga ayay noqotay in dhiigga layga dhubo waanan tagay, walwalkii iyo walbahaarkii ihaystay aawadii waan kari waayay in aan ku soo Waco oo qof isbitaal jooga dhiigna laga shubayo xaaladdiisa waa fahmi kartaa maamule.

Si hoose ayaan iskugu iri: qaraabadu dhib badanaa maxay balaayo inagu qasbayaan in aan tixno bal kawarran waxaas aan sheeegayo haddii ay dhacaan oo waaqic isku baddalaan, xiligaan kaligay ayaa noolaan lahaa, qaar isbitaalada ayaan u diri lahaa qaarka kalena godka aakhiro ayaan u dirilahaa aniga oo sheeganaya cudurdaaryo been abuur ah.!

Waxaan ku iri: iisoo celi tobankii riyaal ee ay gabadhu kuu dhiibtay waxaan baddal ahaan kuusiinayaa boqol riyaal.

Maamulaha indhihiisa waxaa laga garan karaa in uu qiimaha aan sheegay la yaaban yahay, markiiba jeebadiisa ayuu gacmaha ku boobay, si uu iigu soo bixiyo lacagta tobanka riyaal ah, inta uusan gacanta iisoo taagin oo uusan isiin lacagtii ayuu iga dalbaday in aan boqolka riyaal ku wareejiyo, waxaabad moodaa in uu ka cabsanayo in aan ku boodo oo aan ka tago.!

****

Markii aan gacanta ku dhigay lacagtii tobanka riyaal ahayd, markiiba lacagtii ayaan eeg eegay mase waxba kuma qorna inta ku celiyay ayaan ku dhahay: toban kaan riyaal miyay gabdhii yareyd kuu dhiibtay?

Maamulihii: maya

Xaggee ayaad dhigtay tobankaas riyaal ayaan rabaaye.?

Maamulihii: ma xasuusto  waxaa laga yaabaa in aan ku qadeeyey, amaba aan siiyay tagsigii ikeenay.!

****

Markii aan aqrinayay dhambaaladaada ma garaneyn waxa ku qoran tobanka riyaal, laakiin; waxaan jeclaan lahaa in dhammaan dhambaaladaan markii aad qoraysay aan agtaada fadhiyo si aan kuu daawado.!

# 2

# ((WAXAAD II TAHAY WAXWALBA OO QURUX BADAN))

# WAXAAD TAHAY ADDUUNKAYGA.!

Waxaan go'aansaday in aan aado magaalada riyaad oo aan dhawaan uguuray, intii aanan bixin ayaan isha si fiican umariyay dhambaaladii jacaylka ee aad iisoo dirtay, waanan tafatiray si ay unoqoto mid la daabici karo, markii aan ka dhamaaday toostoosinta dhambaaladaadii waxaan udhiibay maamulihii madbacadda, si daran ayuu ubushiyay in uu daabaco, gacaliso ha walwalin.!

Maamulaha waxa bushiga ama naqdiga ka keenay ma ahan in dhambaaladaadu aad uxun yihiin, ama aysan cajabin, ee naqdigiisu wuxuu daaran yahay sababta aanan kuula kulmin, wuxuuna doonayaa in in uu hishiis kula galo wax walba oo aad qortana uu isagu daabaco,

Waliba waxa uu maamuluhu doonayay in aad hishiis toban sano ah wada gashaan.!

Waxa kale oo uu rabay in aan usoo gudbiyo riwaayad kale oo la dhaho: ABAABIIL.

****

wada hadalkaan ayaa maamulaha ina dhex maray:

Waraaqahan daabac.

Maamulihi: maxay yihiin?

Waa buug aan qoray, sidaas ayaan iri aniga oo u amaanaya, markii uu aqriyay shanta bag ee ugu horeeyay ayuu madaxa ruxay kadibna; waxa uu eegay midig iyo bidix, sida canug yar oo dugsi diid ah.!

Maamulihii: macquul maaha  sanadkaan waxaan daabacaynaa ABAABIIL wax kale daabici mayno.

Jaceylku waa waxa ugu weyn ee ninka ragga ah udagaalami karo,

Waxaan suuraystay rajo xumadaaad dareemi doonto marka aan daabaco wax aan dhambaaladaada ahayn, gacanta ayaan ku garaacay miis Meesha ka dhawaa aniga oo xanaaqsan: marka koobaad waa in aad dhambaaladaan daabacdo.

Haddana waxaan dhahay: hishiis keenu wuxuu jideynayay tobanka sano ee soo socota in aad  daabacdo waxwalba  oo aan qoro  laakiin; hishiis kaas waa hilmaamtay, bud dhigga ugu weyn ee hishiis kaas waxa uu ahaa in muddo ah marka la joogaba in aan buug qoro.

Maamulihii: maxaad ka wadaa?

Haddii aadan dhambaaladaan daabicin oo aadan faafin tobanka sano ee soo socota waxba qori maayo halkaasna waxaa ma dhalays ku noqonaya hishiiskii aynu galnay.

Maamulihii oo caraysan ayaa yiri: oo tobanka sano ee soo socda waxba qori maysid? Waxaanu waa is daldalaad caadi ah.!

Haddii aadan igu waafiqin in aad dhambaaladaas daabacdo jid kale kuuma furna.

Waxaan filaayaa in aan maamulaha iska tiiriyay oo uu qaadan doono hishiiska aan usheegay.

Wuxuu si hoose u yiri: laakiin; sanadka soo socda riwaayadda ABAABIIL shaki yaanu galin.!

Waan kaa hubaa waanan kuu soo diraya waliba wey diyaarsan tahay laakiin; waa in mar ka hore aad daabacdo dhambaaladan.

In badan ayaan isku dayay in aan maamulaha ku qanciyo in uu daabaco, xitaa waxaan markii dambe usheegay in  aan lacagtayda gaarka ah ku bixinayo.

Waligay waxba kaama dalban isku day in aad maamule maantay codsigayga meel mariso,

Maamuliihii  cabaar ayuu aamusay wuxuuna yiri: bal si fiican ayaan u aqrin.!

Aqri laakiin; waxaa shardi ah in aadan waxba ka goyn gaar ahaan boggaga ay gabadhii qarsoonayd qortay.

Maamulihii: waraaqahaani ma kuwii ay gabadha yari kuu dhiibtay baa?

Lama hadal maamulihii, laakiin wuxuu yiri: gabadha magaceedu (ة) ku dhamaadana waa midii la socotay miyaa?

Markaaas ayaan u hinqaday  in aan dhaqaaqo markii aan albaabkii bandhigga ka sii dhamaanayay ayaan iri: waxaas shaqadaada maaha.!

****

Maalintii labaad ayuu ii yeeray maamulihii madbacaddu, markaan u imid cabaar ayuu aamusay kadibna wuu dhoola caddeeyay:

Maamulihii: wax magaca ma ubixisay dhambaaladaan?

Mise buugaagii jaldiga madoobaa ee (magaalada jacaylka ma dagaan kuwa caqliga leh) ayaad magac uga dhigaysaa?

Markiiba waan gartay in uu igu waafaqay daabacaadda waraaqaha,

Aniga oo arintaas ku faraxsan ayaan ku iri: may magac kale aynu u bixino.

Buuggaygii hore dhambaaladaan in aan ugu magac daro ma rabin, waayo waxaan suuraysan la'aa in maamuluhu igu waafaqo faafinta dhambaaladaan, cabaar ayaan fekeray, magacyo badan ayaa maankayga isku hardinaya, mana garanayn magaca aan dooran doono, waxaan is iri: amaad magaca ah gabadhii qarsoonayd ubixisaa?

Markaas ayaan afkayga furay, balse naftaada ayaa ku hadaaqday magac aanan si kas ah ugu dhawaaqin oo ahaa:

(WAXWALBA OO QURUX BADAN AYAAD II TAHAY) waxaad tahay adduunkayga

Waxyaabaha qaar waxaa jira si kasta oo loo sugo aan imaan, waxyaabaha qaarna wey imaadaan laakiin; wey soo daahaan,

Waxyaabaha qaarna marka aan helno muhiimad ma siino oo waxyaabo kale ayaanka door bidnaa oo qalbigeennu doonayo.

Wax sugnaanaya ma jiraan adiga uun mooye allahayow.

**Waligaa qalbigayga ayaad ku sugan tahay,**

**Waxaad tahay adduunkayga.**

**Waxaan dhambaalkaan ugu talagalay adiga iyo kuwa habeenkii waxyar uun ka seexda, ee waqti dheer ka hor ugu dambeysay in ay seexdaan,**

**Oo aysan cidna ku dhihin weedhaha jacelka.!!**

# WAXAAD TAHAY ADDUUNKEYGA

## ((Waxwalba oo qurux badan ayaad ii tahay))

**Axmad Aala Xamdaan**

**Turjume:**

**Yuusuf Nuur Xaashi (ifiye)**